"WAXAAN KU HUREEN HORAA LOO QABTAA"

Su'aalo & Jawaabo

Cutubka #1 #2 #3 #4

JUQRAAFI

FORM 4

Su'aalo & Jawaabo

November 27, 2020

“WAARI MAYSIDEE WAR HAKAA HARO”

W/D: A++ GROUP

Su'aalo & Jawaabo

Cutubka #1 CILMIGA JIYOOLOOJIGA

CASHARKA 1aad: CILMIGA JIYOOLOOJIGA

1. Waa maxay cilmiga jiyooloojiga?

- ✓ Cilmiga jiyoolojiga waa cilmiga la xiriira barashada ama daraaseynta isbeddellada iyo dhaqdhaqaaqa dhulka iyo ilaha tamarta ee dhulka ku dhex jira, waxaa intaa dheer cilmigani wuxuu daraaseeyaa waxyaabaha ka qeyb qaatay qaab sameysanka dhulka laga soo bilaabo kumanaan sano ka hor iyadoo loo cuksanayo daraaseynta dhadhaabyada dhulka taa oo laga tiriyo iney tahay arkiifiyada taariikheed oo dhulku leeyahay

2. Waxaad sheegtaa laamaha ugu muhiimsan ee cilmiga Jiyooloojiga?

- ✓ Laamaha ugu muhiimsan ee cilmiga Jiyooloojiga waa:-
  - Jiyoolojiga deegaanka
  - Jiyooloojiga handasada
  - Jiyooloojiga waxbarashada
  - Jiyooloojiga saliida iyo dhaqaalaha.

3. Waa maxay Jiyoolojiga deegaanka?

- ✓ Jiyoolojiga deegaanka waa laan ka mid ah laamaha cilmiga jiyooloojiga wuxuu quseeyaa barashada iyo daraaseynta carrada, biyaha iyo in laga shqeeyo xal u helidda iyo maareynta meelaha ku waxyeeloobay wasakhowga deegaanka.

4. Waa maxay Jiyooloojiga handasada?

- ✓ Jiyooloojiga handasada waa laan ka mid ah laamaha cilmiga jiyooloojiga wuxuu u taagan yahay in xeeldheerayaasha jiyooloojiga ay qeyb ka noqdaan helitaanka qorsho mustaqbeleed oo la xiriira waxyaabaha laga

dhisayo guryaha, buundooyinka, waddooyinka iyo biyo xireennada kadib marka la daraaseeyo awoodda dhadhaabyada, heerka sinnaanta iyo janjeedhka oogada dhulka iyo qaab dhismeedka carrada.

5. Waa maxay Jiyooloojiga waxbarashada?

- ✓ Jiyooloojiga waxbarashada waa laan ka mid ah laamaha cilmiga jiyooloojiga wuxuu quseeyaa daraaseynta heerarka kala duwan ee waxbarashada asaasiga ah iyo tan jaamacadeed.

6. Waa maxay Jiyooloojiga saliida iyo dhaqaalaha?

- ✓ Jiyooloojiga saliida iyo dhaqaalaha waa laan ka mid ah laamaha cilmiga jiyooloojiga ee ka hadasha ama quseysa ilaha tamarta dabiiciga ah sida saliidda, dhuxusha, alaabta caydhiinka ah iyo gaaska dabiiciga ah.

7. Immisa ayaa loo qeybiyaa da'da dhulka?

- ✓ Waxaa loo qeybiyaa afar waa'

8. Muxuu u sii qeybsamaa waa' kasta?

- ✓ Waa' kasta wuxuu u sii qeybsamaa xilliyo.

9. Muxuu leeyahay waa' kasta iyo xilli kasta?

- ✓ Waa' kasta iyo xilli kasta wuxuu leeyahay koox dhadhaab lakabeed ah, nolol xayawaan iyo mid dhir oo isaga u gaar ah, taa oo uu kaga duwan yahay lakabyada kale.

10. Immisa lagu qiyaasaa da'da dhulka?

- ✓ Da'da dhulka waxaa lagu qiyaasaa 2000 milyan sano.

11. Immisa ayaa lagu qiyaasaa qolofta da'da dhulkeeda?

- ✓ Qolofta dhulka da'deeda waxaa lagu qiyaasaa 1500 milyan sano.

12. Maxay ku suura gashay in la qiyaaso da'da dhulka?

- ✓ In la qiyaaso da'da dhulka waxay ku suura gashay daraaseynta waxyaabaha haraadiga ah ama Foosiliska, kuwaa oo laga helay meelo kala

duwan oo dhulka hoostiisa ah iyo sidoo kale daraaseynta lagu sameynayo qaab dhismeedka lakabyada qolofta dhulka iyo isbeddellada ku dhacay.

13. Waxaad sheegtaa waayada Jiyooloojiga?

- ✓ Waayada Jiyooloojiga waa:-
    - Kambiriyan ka horeeye.
    - Waagii Baaliyosooiga
    - Waaga Labaaad ama waagii Nolosha dhexe
    - Waaga saddexaad
    - Waaga cusub.

14. Waa kuma waayada Jiyooloojiga midka ugu dheer?

- ✓ Waa waaga Baaliyosooiga.

15. Maxaa ka mid ah xilliyada uu ka kooban yahay waagii Baaliyoosooiga?

- ✓ xilliyada uu ka kooban yahay waagii Baaliyoosooiga waxaa ka mid ah:-
    - Xilliga kambiriyanka
    - Xilliga Jordonofishka
    - Xilliga Siluriyanka
    - Xilliga Difoniyanka
    - Xilliga Kaarboonka
    - Xilliga Bermiyanka

16. Immisa sano ayuu fidsanaa wagii noloshe dhexe?

- ✓ Waagii nolosha dhexe wuxuu fidsanaa 160 milyan sano.

17. Maxaa ka mid ah xilliyada waagii nolosha dhexe?

- ✓ Xilliyada waagii nolosha dhexe waxaa ka mid ah:-
    - Xilliga tirisikga
    - Xilliga juraasik
    - Xilliga kirtaasiga

18. Immisa xilli ayaa loo kala saaraa waaga cusub?

- ✓ Waxaa loo kala saaraa laba xilli.

19. Maxay yihiin labada xilli ee loo kala saaro Waaga Cusub?

- ✓ Labada xilli ee loo kala saaro Waaga Cusub waxa ay kala yihiin:-
    - Xilliga Baliyostostiinka.
    - Xilliga cusub.

20. Immisa sano ayaa lagu qiyaasaa da'da xilliga Baliyostostiinka?

- ✓ Waxaa lagu qiyaasaa da'diisa 2 milyan sano.

21. Waa maxay xilliga cusub?

- ✓ Xilliga cusub waa xilliga nooluhu ay gaareen heerkoodii ugu sareeyay waana xilliga aadanaha manta jira.

22. Immisa sano ayaa lagu qiyaasaa da'da xilliga Cusub?

- ✓ Waxaa lagu qiyaasaa 1 milyan sano.

23. Immisa sano ayuu gaarayaa Waaga Cusub?

- ✓ Waxa uu gaarayaa 3 milyan oo sano.

24. Waa kuma Waaga ugu waqtiga gaaban Waayada Jiyooloojiga?

- ✓ Waa Waaga Cusub

25. Immisa sano ayaa lagu qiyaasaa da'da Waaga saddexaad?

- ✓ Da'da waaga saddexaad waxaa lagu qiyaasaa 63 milyan sano.

26. Falanqee ahmiyadda dhaqaale ee Waagii Noloshe dhexe?

- ✓ Ahmiyadda dhaqaale ee Waagii Noloshe dhexe:

- Saliida waxa ka mid tahay macdanta sameysantay waagan gaar ahaan xilliga Kiritaasiga taa oo lagu tiriyo isha ugu muhiimsan tamarta manta dunida laga isticmalo.
- Sidoo kale waagani waxaa sameysmay birta Caydhiinka ah Foosfaaytka iyo dhahddabta loo yaqaan Balesterka.

27. Falanqee ahmiyadda dhaqaale ee Waagii Saddexaad?

✓ Ahmiyadda dhaqaale ee Waagii Saddexaad:

- Muhiimada dhaqaale ee waagan waxaa sabab u ah samesanka dhagaxa Nuuriyada iyo dhagaxa Dhoobada ah, oo loo adeegsado soo saarista sibidhka ama shamiindada.
- Iyo isticmaalka Basaltiga kaa oo loo adeegsado dhinacyo badan.
- Sidooo kale ahmiyada waagani waxaa ka mid ah sameysanka Salfarka Caydhiinka, Sinkiga, Balambamka iyo Saliidda.

28. Falanqee ahmiyadda dhaqaale ee Kambiriyan ka horreeya?

✓ Ahmiyadda dhaqaale ee Kambiriyan ka horreeya:

- Dhulka sameysmay ama dhadhaabyada waagani waxay ka kooban yihiin macaadin aad qaali u ah.
- Sida Dahabka, Qalinka, Maarta, Sinkiga, Birta, Karoonka, Niikalka, Tiinka, Balambamka iyo qaar ka mid ah macaadinta shucaaca bixisa.
- Waxaa intaa dheer macaadinta Shiil Cadka iyo Garanaytka.

29. Falanqee ahmiyadda dhaqaale ee Waaga Cusub?

✓ Ahmiyadda dhaqaale ee Waaga Cusub:

- Waxaa loo adeegsadaa Faarkiisa gaar ahaan kuwa sibsibka ah.
- Quruuraxa carrada iyo dhoobada in lagu simo wadooyinka iyo sameynta labenka.
- Faarka wabiga waxaa loo adeegsadaa carrada beeraha oo aad ka u sarreeyo carro sannimadeeda.

30. Falanqee ahmiyadda dhaqaale ee Waagii Baaliyosooiga?

✓ Ahmiyadda dhaqaale ee Waagii Baaliyosooiga:

- Dhadhaab sameysnka xilligaan wuxuu ka kooban yahay Caydhiinka macaadinta birta iyo maganiiska.

- Sidoo kale waxaa laga helaa faar dhuxul ah waxay ku filiqsantahay meelha laga qodo dhuxushaan meelo ka mid ah Yurub, Shiinaha dalalka midowgii Soofiyeetigii hore iyo Koonfur Afrika
- Sidoo kale waxaa laga helaa xaddi aad u yar meelo ka mid ah dhulka carabta sida Yaman iyo Sacuudi Carabiya.

31. Waa kuma waaga la rumeysan yahay inuu yahay waaga oo uu soo ifbaxay Aadanaha?

✓ Waa Waaga Cusub.

32. Falanqee Waaga Saddexaad?

✓ Waaga Saddexaad

- Xagga dherarka wuu ka gaaban yahay waaga labaad.
- Inta lagu jiray waagani waxaa dhacay is beddelo aad u xoog badan oo ku dhacay qolofta dhulka.
- Sidoo kale xilligaan intii lagu jiray waxaa soo ifbaxay tixane buuro ah sida buuraha Al bee eek u yaalla Yurub, Rooki iyo iyo Andiis oo ku yaalla qaaradda Ameerika.
- Waagani waa waaga dhirta ubaxa leh iyo haraadiga abuurada, sidoo kale waa waaga dhirta dabiiciga ah ay yeelatay muqaalka manta ay leedahay.

33. Falanqee Waaga Noloshe dhexe?

✓ Waaga Noloshe dhexe

- Dherer ahaan wuu ka gaaban yahay waagii isaga ka horeeyay.
- Waxaa jiray xooggaa gaabis ah.
- Intii lagu jiray waagan waxaa soo maray dunida wax badan nooleyaal ah.

34. Falanqee Waaga Cusub?

✓ Waaga Cusub

- Guud ahaan waa kan ugu waqtiga gaaban dhammaan waayada jiyooloojiga.
- Waxaa dhacay waxa loo yaqaan waagii barafka, xilligaa oo baraf ku faafay qaaradaha Ameerikada waqooyi, Yurub iyo Aasiya.
- Sidoo kale waagan waxaa dhacay waxaa loo yaqaan waagii roobka, xilligaa oo ay roobab ma hiigan ah ku da'een waqooyiga Afrika iyo Koonfur-Galbeed Aasiya.
- Waxaa la rumeysan yahay in bilowgii waagani oo uu soo ifbaxay aadanaha.

35. Falanqee Waaga Baaliyosooiga?

✓ Waaga Baaliyosooiga

- Waxaa lagu tilmaamaa inuu ahaa waayada jiyooloojiga kan ugu dheer.
- Noocyada noolaha waagani jiray waxaa la rumeysan yahay iney aad u yaraayeen islamarkaana duugbaxa waagani uu ahaa mid aad gaabis u ah.

36. Falanqee Kambiriyan ka horreeya?

✓ Kambiriyan ka horreeya

- Waxaa loo yaqaanaa waaga ka horeeya waaga koowaad, wax badan lagama oga dhererka waagaan, inkastoo la rumeysan yahay in dhulka uu ku dhacay isbeddello aad u badan dhadhaabyadiisana lagama helin wax muujinyo in waagaani nolol ay jirtay.

37. Caddee kaalinta culimada muslimiinta ay ku lahaayeen cilmiga jiyooloojiga?

✓ Culimada muslimiinta waxay ku dhiseen cilmiga jiyooloojiga qaab maangal ah oo aadna u haboon, taa oo ka duwan qaabkii ay cilmiga jiyooloojiga ku dhiseen Gariigga kuwaa oo cilmiga jiyooloojiga u cuksaday hab ku dhisan khuraafaad iyo sheeko baralley, sanadka markuu ahaa 210 hijriga eek u began 825CD muslimiinta waxay sameeyeen inay

cabbiraan dhexroorka dhulka, sidaa oo kale waxay cabbireen wareegga dhulka, natiijada ka soo baxdayna waxay aad ugu dhoweyd natiijooyinka ay soo saareen saynis yahannada casriga ah.

38. Sheeg sannadka ay muslimiinta ay sameeyeen iney cabbiraan dhexroorka dhulka?

- ✓ Waa sannadka marka uu ahaa 210 hijriga eek u beegan 825 CD.

CASHARKA 2^{aad}: JIYOOLOOJIGA SOOMAALIYA

1. Waa maxay caddeymaha ugu muhiimsan ay caddeenaya in filiqsanaanta berriga iyo dhul biyoodka Soomaaliya ay aad uga duwan yahay sida uu ahaan jiray waayada jiyooloojiga ee hore?

- ✓ Caddeymaha ugu muhiimsan ee arrantani waxaa ka mid ah jiritaanka xaddi aad u weyn oo qolfoof badeed ah berriga dhulka Soomaaliya gudahiisa, gaar ahaan meelo aad uga fog badweynta Hindiya iyo dhul joggiisa uu aad uga sarreeyo joogga badda.

2. Muxuu ka kooban yahay Qaab dhismeedka dhulka Soomaaliya?

- ✓ Qaab dhismeedka dhulka Soomaaliya wuxuu ka kooban yahay sagxad Araki ah iyo dhadhaabyada waaga labaad, saddexaad iyo kan afaraad.

3. Maxay ka kooban yihiin dhadhaabyada sagxaddaan Arakiga ah?

- ✓ Dhadhaabyada sagxaddaan Arakiga ah waxay ka kooban yihiin sida aasaasiga Garanayt iyo Dayorayt (diorite).

4. Waa maxay sababta in qaabsameysanka dhulka ee waaga koowaad uusan ku jirin dhulka Soomaaliya?

- ✓ Sababta waxay tahay dhammaan dhul sameynsanka waagaan waxay ku baaba'day carra guurkii dhacay dartii waaga labaad iyo in dhul sameysanka ee waagaan qaarkii uu ku qarsoon yahay dhul sameysanka isaga ka da'yar.

5. Maxaa ku daboolan dhulka jasiirad u egta Soomaaliya?

- ✓ Qeyb ballaaran oo ka mid ah dhulka jasiirad u egta Soomaaliya waxaa ku daboollan dhadhaabyada xilliga Ayuusiin.

6. Maxaa ka mid ahaa dhagaxyadda sameysmay intii lagu guda jiray dhul sameysanka xilliga Ayuusiinka?

- ✓ Waxaa ka mid ahaa dhagaxyadda sida: dhagax nuuradeedka iyo dhagaxa dhoobada.

7. Halkee ayay ku dhadhaabyada xilliga Ayuusiinka dhexe?

- ✓ Dhadhaabyada xilliga Ayuusiinka dhexe waxaynu arkeynaa in ay ku dahaaran tahay dhulka waqooyi bari (Bunland iyo Mudug), waxay muuqaneysaa hareeraha waadiga Nugaal iyo Baran iyadoo lakabyo dhagax nuuradeed ah.

8. Maxaa uu ku bilowday dhul sameysanka waaga afaraad (Xilliga Baaliyoosiin)?

- ✓ Waxa uu ku bilowday dhul sameysanka waaga afaraad lakab dhagaxeed ah oo isku xig xiga, taa oo ku aaddan xilliga ay sameysmayeen lakabyada Cadan ee foolkaanaha ah kana kooban Basalti iyo Riyoolayt.

9. Maxay ka kooban tahay dhadhaabta basaltiga ah ay ku dahaaran banaanada Seylac?

- ✓ Waxa ay ka kooban tahay Oksiidka foolkaanaha, Riyoolayt, Quwaartis iyo Haraadiga foolkaanaha.

10. Maxaa uu ka kooban yahay haddii aynu eegno toga Hargeysa?

- ✓ Haddii aynu eegno toga Hargeysa waxaynu arkeynaa in uu ka kooban yahay lakabyo dhoobo ah oo lagu magacaabo Malaas, kaa oo ay dadka Soomaalidu u isticmaalaan in ay timaha ku qurxistaan waana burburka dhadhaabyada Ayuusiiniga ah.

11. Maxaa uu la xiriiraa dhaqdhaqaaqa Gilgilka guud?

- ✓ Dhaqdhaqaaqa Gilgilka guud wuxuu la xiriiraa sameysanka Gacanka Cadmeed.

12. Goormuu dhacay dhaqdhaqaaqa gilgilka ee ugu dambeeyay?

- ✓ Dhaqdhaqaaqa gilgilka ee ugu dambeeyay wuxuu dhacay xilliga Miyuusiinka waxaana ka dhashay shucaabiga taxan iyo in ay kor u soo baxaan dhadhaabta ku dhawaad 1000 foodh (cag) oogada sare ee badda.

13. Ma isku mid baa Noocyada carrada ee dhulka Soomaaliya?

- ✓ Maya Noocyada carrada ee dhulka Soomaaliya waa kala jaad.

14. Maxaa keenay kala duwanaashaha carrada dhulka Soomaaliya?

- ✓ Kala duwanaashaha carrada dhulka Soomaaliya waxaa keenay nooca cimilada iyo dhadhaabta.

15. Waa immisa noocyada Carrada dhulka Soomaaliya?

- ✓ Noocyada carrada dhulka Soomaaliya waa shan nooc.

16. Maxay kala yihiin shanta nooc ee Carrada dhulka Soomaaliya?

- ✓ Shanta nooc ee Carrada dhulka Soomaaliya waxa ay kala yihiin:-
  - Carrada bannaan xeebeedka.
  - Carro lakabeed ka kooban Nuurad iyo nataax.
  - Carro nuuraad.
  - Carro foolkaano.
  - Carro dhoobada madow.

17. Halkee ayay ku fidsantahay carrada bannaan xeebeedka?

- ✓ Carrada bannaan xeebeedka waxay fidsantahay dhulka xeebaha ah ee ku dherarsan Badda Cas, Gacanka Cadmeed iyo Badweynta Hindiya, guud ahaan carradani waa mid bataax ah oo qururax ah oo laga helo salka hoose ee buuraha, dulaha iyo daltooyinka wabiyada?

18. Maxaa ay ku wanaagsantahay Carrada bannaan xeebeedka?

- ✓ Carrada bannaan xeebeedka waxa ay ku wanaagsantahay dhul beereed marka laga reebo meelo laga helo ilo biyood joogto ah.

19. Maxay ka koobnaan kartaa carro lakabeedka?

- ✓ Waxay ka koobnaan kartaa carro gaduudan, mid jaallo xigeen ah iyo carro cad.

20. Halkee laga helaa Carrada lakabeed ka kooban nuurad iyo bataax?

- ✓ Waxaa laga helaa bannaannada iyo dulaha labadaba.

21. Halkee ayay ku fidsantahay Carro nuurada?

- ✓ Carro nuurad waxay aad ugu fidsan tahay badhka waqooyi ee dhulka Soomaaliya inta badan waxay noqoneysaa qaab bataax ah qeybaha galbeed iyo qeybaha koonfur galbeed, halkaa oo ay yaraaneyso saamiga nuuradda.

22. Halkee ayaa laga helaa Carro foolkaano?

- ✓ Waxay ku badan tahay carradaan meelaha ay ka dhacday dhaqdhaqaaqa foolkaano ah sida ka jirta meelaha hoose oo gobolka waqooyi, gaar ahaan dhinacyada galbeed, sidoo kale togagga ku dherarsan wabiyada Jubba iyo Shabeelle.

23. Halkee ayaa laga helaa Carro dhoobada Madow?

- ✓ Waxaa laga helaa daltooyinka wabiyada Jubba iyo Shabeelle.

24. Sheeg carrada ugu habboon xagga beerashada dalagyada kala duwan?

- ✓ Waa Carrada dhoobada madow.

25. Maxay ku habboon tahay Carro dhoobada Madow?

- ✓ Carro Dhoobada Madow waxa ay ku habboon tahay xagga beerashada dlagyada kala duwan.

26. Maxaa heysta guud ahaan carrada dhulka Soomaaliya?

- ✓ Guud ahaan carrada dhulka Soomaaliya waxaa heysta dhibaatooyin ay ka mid tahay carro burbur oo ay sababayaan waxyaabaha keena carro guurka haka yimaadaan xagga dabaysha ama xagga biyaha, dhirta oo aad u yar,

dadka oo aad ugu howllan jaridda dhirta si ay dhuxul uga dhigtaan.sidoo kale carrada dhulka Soomaaliya waxaa dhibaato ku hayo orgaanig yari iyo heerka milixda oo aad u sarreeyo curiyeyaasha carrrada dhexdooda.

27. Tilmaan xilliyada jiyooloojiga ee Soomaaaliya?

- Xilliga tirisik
- Xilliga juraasik
- Xilliga Ayuusiin
- Xilliga Baaliyoosiin

Su'aalo & Jawaabo

Cutubka #2 NOLOLEY

CASHARKA 1aad: QEEXIDDA NOLOLEY

1. Waa maxay nololey?

✓ Nololey waa dhammaan nololeyda ama noolaha laga helo oogada sare ee dhulka waxaana ka mid ah dhirta, xayawaanka iyo aadanaha.

2. Maxaa ay ka dhashaan Nololeyda?

✓ Nololeyda waxa ay ka dhashaan falgalka u dhaxeeya gibilada dhulka sida gibilka oogada dhulka, gibilka biyoodka iyo gibilka hawada.

3. Sheeg astaamaha nololeyda?

✓ Astaamaha Nololeyda:-

- Nololeyda waxay metalaysaa qeybta nool ee deegaanka, taa oo awood u leh in ay Taranto iyo in ay kobacdo xaaladda nolosha ku habboon awgeed.
- Waxaa jiro isdhaafi karboon laba oksayd oo u dhaxeeya nololeyda iyo gibilka hawada, halkaa oo ay dhirtu ka qaadaneyso kaarboon laba oksaydhka, ginilka hawada waxay siineysaa Oksijiin (Oxygen O_2) marka ay dhaceyso fotosentasiska. Nooluhu waxuu qaadanyaa Oksijiin wuxuuna ku deynayan gibilka hawada kaarboon laba oksaydh (CO_2) marka ay neefsanayaan.
- Gibilka nololeyda waxaa lagu yaqaanaa kala duwanaanta waxa uu ka kooban yahay ee noolaha iyo ma noolaha waxaana isla falgelaayo noolaha iyo ma noolaha.

4. Maxaa uu ka kooban yahay gibilka nololeyda?

✓ Gibilka nololeyda wuxuu ka kooban yahay dhammaan:

- Carrada

- Dhirta
- Xayawaanka
- Aadanaha

5. Waa maxay carro?

✓ Carro waa dhagax burburay kaa oo ay ku dhacday isbeddello Kiimiko ah, ayna ku milmaan waxyaabo Orgaanic ah.

6. Waa immisa noocyada carrada?

✓ Noocyada carrada waa saddex nooc.

7. Maxay kala yihiin saddexda nooc ee Carrada?

✓ Saddexda nooc ee Carrada waxa ay kala yihiin:-

- Carro madow
- Carro gaduud
- Carrada Hurdiga

8. Waa maxay Carro madow?

✓ Carro madow waa noocyada carrada tan ugu wanaagsan beerashada.

9. Intee laga helaa Carro madowda?

✓ Carro madowda waxaa laga helaa meelaha foolkaanaha iyo hareeraha wabiyada halkaa o ah bannaan fataha.

10. Waa maxay Carro gaduuda?

✓ Carro gaduud waa carro taas oo midabkeeda keentay jiritaanka burburka birta (Iron Oxides).

11. Halkee laga helaa Carro gaduud?

✓ Waxy ku filiqsantahay carradaan gobollada Kulaaleyda, badhaalaha iyo sidoo kale gobollada kulaaley xigeenka ah.

12. Waa maxay Carrada Hurdiga?

✓ Carrada Hurdiga waa carrada taasoo ku haboon tahay in lagu beerto dalagyada qaarkood.

13. Intee laga helaa Carrada Hurdiga?

✓ Carrada Hurdiga waxaa laga helaa meelaha lama degaanka ah.

14. Maxaa ka mid ah Ahmiyadda ay Carradu u leedahay noolaha?

✓ Carradu si guud waxay waxtar weyn u leedahay dhammaan noolaha sida Aadanaha, dhirta waxaana ka mid ah waxtarka carrada sida soo socota:

- Xididdada dhirta waxaa dhulka ku hayo waa carrada taa oo keeneyso in dhirtu ay korto ama u kobacdo si dabiici ah.
- Carradu waxay dhirta iyo cowska dhulka lagu beero siineysaa biyaha iyo macaadinta milixda (cusub), taa oo ka dhigan quudka dhirta.
- Waxay ka shaqeyneysaa ciiddu iney cunnada soo gudbiso, sidoo kale waxay ka dhigan tahay hoy ay leeyihiin xayawaannada.
- Waxay burburineysaa waxyaabaha Orgaanigga ah iyadoo loo marayo waxyaabaha il ma aragtida ah, gaar ahaan kuwooda ku nool ciidda dhexdeeda, halkaa oo ay ka shaqeyneyso dib ugu soo celinta xaaladda dabiiciga ah.
- Ugu dambeyntii si ay ciiddu u gudato howlaheeda kala duwan una soo gudbiso waxtarkeeda ay u leedahay habdhis deegaanka dhammeystiran, waxaa lama huraan ah in aynu daryeelno bed qabka carrada annagoo adeegsanayno habab aynu ku ilaalin karno ciidda. Waa in aynu ka fogaanno ku tuuridda ama ku aasidda carrada dhexdeeda waxyaabaha haraadiga ah gaar ahaan kuwa carrada wax yeeleynayo, in aynu yareyno waxyaabaha bacriminta carrada ee kiimikada ah ee lagu darayo carrada maxaayeelay waxyaabahani waxay keenayaan in ciiddu ay lumiso bacrinimadeeda.

15. Maxaa ay ka kooban tahay carrada?

✓ Carradu waxay ka kooban tahay maaddooyin badan waxaana ka mid ah:

- Walxo macdaneed.
- Huyuumas
- Biyo
- Hawo

16. Sheeg waxyaabaha ka qeyb qaata sameysanka carrada?

✓ Waxaa ka mid:

- Carro guurka.
- Dhagax burbur.
- Tuulimaad

17. Maxaa inta badan dhaliya carro guurka?

✓ Carro guurka waxaa inta badan dhaliya ama keena dadka, xoolaha, biyaha iyo dabaysha.

CASHARKA 2aad: NOLOSHA DHIRTA IYO XAYAWAANKA DUNIDA

1. Maxaa lagu tiriyaa dhirta dabiiciga ah?

✓ Dhirta dabiiciga waxaa lagu tiriyaa in ay tahay qodob muhiim u ah jiritaanka xayawaanka iyo Aadanaha.

2. Waa immisa qeybaha aan u qeybin karno dhirta dabiiciga ah?

✓ Dhirta dabiiga waxa aynu u qeybin karnaa saddex qeybood.

3. Maxay kala yihiin saddexda qeyb oo aynu u qeybin karno dhirta dabiiciga ah?

✓ Saddexda qeyb oo aynu u qeybin karno dhirta dabiiciga ah waxa ay kala yihiin:-

- Kaymaha
- Harame
- Caws

4. Maxay tahay ahmiyada ay leedahay Keymaha marka loo fiiriyo qeyb ahaan Dhirta dabiiciga?

✓ Keymaha waa qeybta ugu weyn uguna muhiimsan qeybaha dhirta, waxayna ka baxdaa meelha laga helo biyo markaana carrada iyo heerkulka ay ku habboon tahay

5. Waxaad sheegtaa Keymaha dunida ugu muhiimsan?

✓ Keymaha dunida ugu muhiimsan waxaa ka mid ah:-

- Keymaha Kulaaleyda.
- Keymo Xilliyeed.
- Keymaha cimilada dhexdhexaadka
- Keymaha qaboobaha.

6. Immisa nooc ayaa loo kala qeybiyaa Keymaha cimilada dhexdhexaadka iyo Keymaha qaboobaha?

✓ Waxaa look ala qeybiyaa laba nooc.

7. Maxay kala yihiin labada nooc ay look ala qeybiyo Keymaha cimilada dhexdhexaadka iyo Keymaha qaboobaha?

✓ Waxa ay kala yihiin:-

- Kaymaha caleen dhacsadayaasha.
- Keymaha caleen irbadleyda.

8. Halkee ayuu ka baxa Haramaha?

✓ Haramaha waxa uu ka baxaa meelaha uu ka da'o xaddi roobeed yar oo aan ogolaaneyn in ay ka baxdo geedo waaweyn, wuu istaagayaa koritaankooda xilliga qalleylka ah.

9. Immisa nooc ayaa loo qeybiyaa Haramaha marka loo eego ku xirnaanta xaddiga roobka?

✓ Haramaha waxaa loo qeybiyaa laba nooc marka loo eego ku xirnaanta xaddiga roobka.

10. Waa maxay laba nooc ee loo qeybiyo Haramaha marka loo eego ku xirnaanta xaddiga roobka?

✓ Waxa ay kala yihiin:-

- Safaanaha.
- Istibsi.

11. Waa maxay Safaanaha?

✓ Safaanaha waa cows dhaadheer oo adag.

12. Waa maxay Istibsi?

✓ Istibsi waa harame gaagaaban oo jilicsan.

13. Waa maxay caws?

✓ Caws waa dhir gaagaaban oo kala jaad ah taa oo ka baxdo meelo kala duwan oo dunida ka mid ah, inta lagu jiro xilli roobaadka, dhammaadka roobkana way qallaleysaa.

14. Waa maxay waxyaabah saameeya dhirta dabiiciga ah?

✓ Waxyaabah saameeya dhirta dabiiciga ah waxaa ka mid ah:-

- Carrada
- Kala sarreynta dhulka
- Heerkulka iyo iftiinka
- Xaddiga da'aaga (roobka).

15. Sidee carrada u saameysaa dhirta dabiiciga ah?

✓ Carrada waa halka ay ka baxdo dhirta isla markaana lagama maarmaanka u ah koritaanka dhirta, tusaale ahaan waxay ku tirsan tahay cufnaanta dhirta, heerka carrosan iyo heerka carrasannimo yari iyo qoyaankeeda.

16. Sidee kala sarreynta dhulka u saameysaa dhirta dabiiciga ah?

- ✓ Nooca iyo cufnaanta dhirta dabiiciga ahi way kala duwan tahay iyadoo loo eegayo heerka janjeedhka dhinacyada buuraha, markasta oo uu kordho heerka janjeedhka waxaa yaraanayo herka jiritaanka dhirta dabiiciga ah iyo cufnaantiisa.

17. Sidee heerkulka iyo iftiinka u saameyaan dhirta dabiiciga ah?

- ✓ Heerkulka iyo iftiinka waxaa saameyntooda dhirta dabiiciga ah laga ogaan karaa marka leys barbardhigo dhirta meelaha cirifyada ah iyo kuwa meelaha cirif-xigeenka ah.

18. Sidee xaddiga da'aaga (roobka) u saameyaa dhirta dabiiciga ah?

- ✓ Wuxuu saameen ku leeyahay cufnaanta iyo kala jaadnimada dhirta dabiicga ah, tusaale ahaan meelaha uu roobkoodu aadka u yar yahay sida meelaha lama degaanka ah, dhirtooda waxay nqoneysaa mid aad u xaddidan taa oo ku kooban harameyaasha qaarkood iyo geed yar yar ah oo u gegsan kara abaaraha iyo oomanaha. Halka ay kordheyso dhirta dabiiciga ah si tartiib ah meelaha oo roobkoodu yahay dhexdhexaadka ilaa dhirtu ay ka noqoto mid aad u cufan marka la gaaro meelaha roobabkoodu mahiigaanka yahay.

19. Waa maxay ahmiyadda iyo waxtarka dhirta dabiiciga ah?

- ✓ Waxtarka iyo ahmiyadda dhirta dabiiciga ah waxynu ku soo koobi karnaa qoddobada soo socda:-

- Waxay ilaalisaa qoyaanka carrada, waxay ka qeyb qaadataa isku dheellitirnaanta deegaanka, waxay noolaha siisaa Oksijiinka lama huraanka u ah noolaha waxay yarreysaa Kaarboon laba Oksaadhka (CO_2), waxay qaboojisaa oo ay neecaaw siisaa jawiga.
- Waxay yarreysaa xaalufka ama in uu dhulka alama degaan isu bedelo.
- Dalalka qaar waxay u adeegsadaan il tamar ama shidaal, sidoo kale sidoo kale waxay alaab caydhiin u tahay warshadaha alwaaxda sameeyo iyo kuwa daawooyinka sameeyo.

- Qaar badan oo ka mid ah noocyda dhirta dabiiciga ah ayaa sidoo kale loo isticmaalaa in laga helo cunno dabiiciga ah ee xayawaanka sida daaqa, noocyada qaarna waxaa loo isticmaalaa inay cunno u noqdaan Aadanaha.
- Waxaa sii dheer in loo isticmaalo sida Jardiinooyinka iyo Keydka dabiiciga.

20. Waa maxay khataraha ama dhibaatooyinka heysta dhirta dabiiciga ah?

✓ Kheyradka dhirta ee dabiiciga ah waxaa heysta dhibaatooyin iyo khatar halis ku ah jiritaankooda waxaana ka mid ah:-

- Isticmaal xumada aadanaha ee la xiriirta dhirta dabiiciga ah: waxaana ka mid ah ballaarinta bedka dhul beereedka, ballaarinta magaalooyinka kuwaa oo ku durkay bedka dhulka kaymaha ahaa kaa oo ay ka bixi jirtay dhirta dabiiciga ah.
- Gubashada keymaha: gubashada keymaha waxaa lagu tiriyaa waxyaabaha halista ah ee dhibaato weyn u geysanayo dhirta dabiiciga ah.
- Isbeddelka xun eek u dhacay deegaanka dhirta: sida abaaraha, aafooyinka oo faafa iyo cudurrada dhirta ku dhaca.

21. Waa maxay waxyaabaha saameeya filiqsanaanta xayawaannada dhulka oogadiisa ah?

✓ Filiqsanaanta xayawaannada dhulka dushiisa waxaa saameyn ku leh waxyaabo badan oo juqraafi ah waxaana ka mid ah:

- Dhirta dabiiciga ah
- Cimilada
- Kala sarreynta dhulka

22. Sidee dhirta dabiiciga ah u saameysaa filiqsanaanta xayawaanada dhulka oogadiisa ah?

✓ Filiqsanaanta xayawaannada waxay si xoog badan ugu xiran tahay dhirta dabiiciga ah, xayawaan kasta wuxuu leeyahay nooc dhir ah oo ku habboon,

tusaale ahaan meelaha Safaanaha waxaa lagu tiriyaa goobaha ugu hodansan xagga dhirta xayawaannada.

23. Sidee cimilada u saameysaa filiqsanaanta xayawaanada dhulka oogadiisa ah?

✓ Cimilada waxay saameyn toos ah ku leedahay fliqsanaanta xayawaannada ee dhulka oogadiisa, tusaale ahaan xayawaannada qaarkood kaliya waxay ku noolaan karaan meelaha aadka qabowga u ah sida Madax Kutiga cirifyada, bakeylaha cirifka, shimbiraha batkiiga IWM. Halka xayawaannada qaarkood ay ku noolyihiin meelaha kulul ee ay ka jirto abaarta sida geela IWM.

24. Sidee kala sarreynta dhulka u saameyaa filiqsanaanta xayawaanada dhulka oogadiisa ah?

✓ Nooc kasta oo kala sarreynta dhulka ah wuxuu leeyahay noocyo xayawaanno oo ku nool dhexdiisa, tusaale ahaan ahaan waxa ka mid xayawaannada (Laam) ee ku noolaa Buuraha joogga sare sida buuraha Andes, xayawaannadaan waxay ku noolaan karaan jog gaarayo dherer ahaan 3000m marka loo eego joogga badda, waa joog aad u dheer oo aysan ku noolaan Karin xayawaannada kale.

25. Immisa nooc ayaa loo qeybin karaa xayawaannada?

✓ Waxaa loo qeybin karaa Shan nooc.

26. Waa maxay shanta nooc ee look ala qeybin karo xaywaanada?

✓ Waxa ay kala yihiin:-

- Il-maragto
- Cayayaan
- Ugaarsade
- Baalaley (shimbiro)
- Daaqayaal

CASHARKA 3aad: GOBOLLADA DABIICIGA AH

1. Waa maxay gobol dabiici ah?

✓ Gobol dabiici ah waa goob dhulka ka mid ah oo leh astaamo isku mid ah marka laga eego xagga cimilada iyo dhirta, kana duwan gobollada kale.

2. Maxay yihiin gobollada ugu muhiimsan ee dunida?

✓ Gobollada ugu muhiimsan (Gobollada Dabiiciga ah) ee dunida waa:-

- Gobollada kulaalayda kulul.
- Gobollada diirmaad dhex-dhexaadka ah.
- Gobollada qaboobaha dhex-dhexaadka ah.
- Gobollada qaboobaha cirifyada.
- Gobollada buuraleyda.

3. Halkee ayuu Gobolka Kulul u fidsan yahay?

✓ Wuxuu u fidsan yahay gobolkani laba dhan ee dhul baraha ee meelaha hooseeya inta u dhaxeysa loolalka 5° waqooyi iyo koonfur, wuxuu u ballaaran yahay dhanka Bari ee qaaradaha.

4. Maxaa ka mid ah tilmaamaha iyo astaamaha gobolka badhaalaha?

✓ Tilmaamaha iyo astaamaha gobolkaan waxaa ka mid ah:

- Heerkulka oo sarreeya sanadkoo dhan.
- Faraqa heerkulka maalintii oo aad u weyn.
- Faraqa heerkulka sanadeedka oo yar, kaa oo aan ka badneyn 5°, wuuna kasii yaraanayaa badaha korkooda.
- Roobka oo badan, wuxuuna ka sarreeyaa 1500mm, waana celceliska sanadlaha ah, wuxuuna circa da'aaya sanadkoo dhan, roobku wuxuu kordhayaa xilliga guga iyo dayrta.

5. Maxaa ka mid xayawaannada ugu muhiimsan ee hoyga uu u yahay Gobolka Badhaalaha?

- ✓ Xayawaannada ugu muhiimsan ee hoyga uu u yahay gobolka badhaalaha waxaa ka mid ah, daanyeerta, xammaaratada, geriga, sidoo kale dusha sare ee kaymaha waxaa ku nool noocyo badan oo baalaley ah (shimbiro) oo midabbo kala duwan leh iyo yaxaas oo webiyada ku dhex nool.

6. Waa maxay ahmiyadda dhaqaale ee Gobolka Badhaalaha?

- ✓ Geedaha ku yaalla gobolkaan waxaa laga soo saaraa alwaax, waxaa lagu beerta cinjirka, kookaha iyo qunbaha.

7. Halkee ayay ku fidsan yihiin Gobollada Kulaaleyda ah?

- ✓ Gobollada Kulaaleyda ah waxay fidsan yihiin goloob-badhka waqooyi iyo kan koonfureed inta u dhaxeysa 5°-23. 5° waqooyi iyo koonfur.

8. Waa maxay tilmaamaha cimilada ee Gobollada Kulaaleyda ah?

- ✓ Tilmaamaha cimilada ee Gobollada Kulaaleyda ah:
  - Waxaa tilmaan u ah gobolkaan sarreynta heerkulka sanadkoo dhan, faraqa sanadlaha ee heerkulka gobolkaan wuxuu ka badan yahay faraqa sanadlaha ah ee heerkulka gobolka badhaalaha, haddii aynu eegno da'aaga (roobka) gobolkaan wuxuu can ku yahay kala duwanaan aad u badan oo xagga xaddiga ah iyadoo loo eegayo xilliyada kala duwan.

9. Waa maxay Nolosha Xayawaanka ee Gobollada Kulaaleyda ah?

- ✓ Gobollada kulaaaleyda waxa lagu tiriyaa iney tahay gobollada dabiiciga ah kuwa ugu hodansan xagga nolosha xayawaannada.

10. Immisa qeyb ayaa loo qeybiyaa nolosha xayawaannada ku nool Gobollada Kulaaleyda ah?

- ✓ Waxaa loo qeybiyaa laba qeybood oo waaweyn.

11. Maxay kala yihiin laba qeybood ee ugu waaweyn ee loo qeybiyo nolosha xayawaanada ku nool Gobollada Kulaaleyda ah?

- ✓ Waxa ay kala yihiin:-
  - Xayawaannada daaq cunaha ah (daaqe).

- Xayawaannada Ugaarsada ama hilibka cuna.

12. Waa maxay xayawaannada daaq cunaha ah?

✓ Xayawaannada daaq cunaha ah (daaqe) waa kuwa ku nool cawska, sida cowsha, geriga, maroodiga, lo'gesiga duur joogta ah iyo kuwa kale.

13. Waa maxay Xayawaannada Ugaarsada ama hilibka cuna?

✓ Xayawaannada Ugaarsada ama hilibka cuna waa sida Libaaxa, haramcadka iyo shabeelka iyo kuwa kale.

14. Waa maxay ahmiyadda dhaqaale ee Gobollada Kulaaleyda ah?

✓ Ahmiyadda dhaqaale ee Gobollada Kulaaleyda ah:

- Waxaa la baabi'iyay haramaha ka baxayay dhulkaan qaarkiis waxaana lagu beeray dhulka suufka, galley iyo qasabka sonkorta, taa micnaheedu waxay tahay halkani waxaa ka jirta mehradda beero qodoshada.

15. Halkee ayuu ku filiqsanyahay Gobolka Mansuunta?

✓ Gobolka Mansuunta waxaa laga arki karaa meelaha uu roobkoodu da'ayo hal xilli waana xilliga xagaaga sababtoo ah xilligaan waxaa soo dhabaneysa dabaysha mansuunta.

16. Maxaa ka mid ah Gobolka Mansuunta?

✓ Waxaa ka mid ah dhulkani xeebaha Gaana ee Afrika, xeebaha Galbeedka Hindiya, xeebaha waqooyi-bari ee qaarada Ameerikada Koonfureed iyo Koonfur-galbeed ee jasiiradda Carabta.

17. Waa maxay tilmaamaha cimilada Gobolka Mansuunta?

✓ Tilmaamaha cimilada Gobolka Mansuunta:

- Waxaa astaan u ah gobolkaan heerkul sare oo sanadkoo dhan ah.
- Sidoo kale roobabkiisu waxay da'aan xilliga xagaaga.
- Halka xilliga jiilaalka uu yahay mid qallalan.

18. Waa maxay lama degaanku?

- ✓ Lama Degaanku waa melaha ay biyuhu ku yar yihiin ama dhif yihiin, waxaana astaan u ah qalleyl.

19. Immisa ayuu gaarayaa roobka celceliska sannadlaha ee Lama Degaanku?

- ✓ Celceliska roobka sanadlaha ah wuxuu ka yar yahay 350mm.

20. Waa immisa loolalka oo uu u dhaxeeyo Gobolka lama degaan ah?

- ✓ Gobolkani wuxuu u dhaxeeyaa loolalka 18°-30° Waqooyiga Badhaalaha ee galbeedka qaaradaha.

21. Sheeg nolosha xayawaannada ee Gobolka Lama Degaanka ah?

- ✓ Gobolka Lama Degaanka ah waxaa ku nool deerada, dawacada, yeeyda, masaska iyo abeeso lugaa leeyda.

22. Maxay tahay ahmiyadda dhaqaale ee Gobolka Lama Degaanka ah?

- ✓ Waxaa jira Gobolka Lama Degaanka ah mehradda xoolo dhaqashada, sidaaa oo kale dhirta lama degaanka qaarkoodna waxaa loo isticmaalaa daawo ahaan.

23. Sheeg loolalka uu u dhaxeeyo Gobolka Badda dhexe?

- ✓ Gobolka Badda dhexe wuxuu u dhaxeeyaa loolalka 40°-30° waqooyiga iyo koonfurta dhul baraha ee galbeedka qaaradaha dhexdooda.

24. Waa maxay tilmaamaha cimilada ee Gobolka Badda dhexe?

- ✓ Tilmaamaha cimilada ee Gobolka Badda dhexe:
  - Kuleyl.
  - Qalleyl xilliga xagaaga.
  - Diirimaad oo roob leh xilliga jiilaalka.

25. Sheeg xayawaannada ku nool Gobolka Badda dhexe?

- ✓ Xayawaannada ku nool Gobolka Badda dhexe waxaa ka mid ah:
  - Dawacada
  - Deerada
  - Bakeylaha.

26. Waa maxay ahmiyadda dhaqaale ee Gobolka Badda dhexe?

✓ Waxaa loo isticmaalaa miraha geedaha gobolkani beerashada firilayda, miraha iyo seytuunka.

27. Sheeg loolalka uu u dhaxeeya Gobolka goodiga Bari?

✓ Gobolka goodiga Bari waxa uu u dhaxeeya loolka 30°- 40° waqooyiga iyo koonfurta dhul baraha ee bariga qaaradaha.

28. Sheeg tilmaamaha cimilada ee Gobolka goodiga Bari?

✓ Tilmaamaha cimilada ee Gobolka goodiga Bari:

- Kuleyl xilliga xagaaga
- Diirimaad xilliga jiilaalka iyo roob da'ayo sanadkoo dhan.

29. Sheeg xayawaananada ku nool Gobolka goodiga Bari?

✓ Xayawaananada ku nool Gobolka goodiga Bari waxaa ka mid ah:

- Dhurwaaga
- Yeeyda
- Shimbiraha

30. Waxaad sheegta ahmiyadda dhaqaale ee Gobolka goodiga Bari?

✓ Waxaa laga faa'iideystaa alwaaxda geedaha dhulkaan.

31. Sheeg loolalka uu u dhaxeeyo Gobolka dhex-dhexaadka qabow?

✓ Waxa ay u dhaxeeyaan loolalka 40° - 60° waqooyi iyo koonfurta dhul baraha xeebaha galbeed ee qaaradaha.

32. Waxad sheegtaa tilmaamaha cimilada Gobolka dhex-dhexaadka qabow?

- Dhex-dhexaad xilliga xagaaga
- Qabow xilliga jiilaalka ah
- Roobab sannadkoo dhan ah.

33. Sheeg xayawaannada ku nool Gobolka dhex-dhexaadka qabow?

✓ Waxaa ku nool xayawaannada rinnada, dawacada IWM.

34. Waxaad sheegtaa ahmiyadda dhaqaale ee Gobolka dhex-dhexaadka qabow?

✓ Waxa lagu beertaa gobolkaan firileyda, sida qamadiga, sarreynta iyo barileyda.

35. Waxaad sheegtaa loolalka uu u dhaxeeyo Gobolka Qaaradeed?

✓ Waxa uu u dhaxeeyaa 30° - 60° bartamaha qaaradaha.

36. Waxaad sheegtaa tilmaamaha cimilada Gobolka Qaaradeed?

- Xagaaga dhexdhexaad ah.
- Jiilaal oo aad u qabow.

37. Waxaad sheegtaa xayawannada ku Gobolka Qaaradeed?

- Dawacada
- Xammaaratada.

38. Waxaad sheegtaa ahmiyadda dhaqaale ee Gobolka Qaaradeed??

✓ Waxaa laga faa'iideystaa kaymaha toobineeedka kuwaa oo lagu tilmaamo alwaaxda ugu wanaagsan, sidaa awgeed waxay leeyihiin qiimo dhaqaale oo aad mmuhiim u ah.

39. Sheeg loolalka uu u dhaxeeyo Gobolka Looraanshiyaanka?

✓ Gobolka Looraanshiyaanka wuxuu u dhaxeeyaa 40° - 60° waqooyiga iyo koonfurta dhul baraha ee bariga qaaradaha.

40. Waxaad sheegtaa tilmaamaha cimilada ee Gobolka Looraanshiyaanka?

- Xagaa dhex-dhexaad ah.
- Jiilaal qabow ah
- Roobabkiisuna waa dhex-dhexaad sannadkoo dhan.
- Xagaa mahiigan ah

41. Waxaad sheegtaa xayawaannada ku nool Gobolka Looraanshiyaanka?

✓ Waxaa ka mid ah: Dabagaalaha, dawaco IWM.

42. Waxaad sheegtaa ahmiyadda dhaqaale ee Gobolka Looraanshiyaanka?

✓ Waxaa laga faa'iideystaa kaymihiisa caleen dhacsadeyaalka ah, kuwaa oo lagu tilmaamo alwaaxda ugu wanaagsan, sidaa awgeed wuxuu leeyahay qiima dhaqaale, waxaa intaa dheer jiritaankooda waa mid sare.

43. Sheeg loolalka uu u dhaxeeyo Gobolka cirifka?

✓ Gobolka cirifka wuxuu u dhaxeeyaa loolalka 60°- 90° waqooyiga iyo koonfurta dhul – badhaha.

44. Waxad sheegtaa tilmaamaha cimilada ee Gobolka cirifka (Gobollada qaboobaha ah)?

- Xagaa qabow ah oo aad u gaaban
- Jiilaal qabow oo aad u dheer
- Roobab qaab baraf ahaana u da'da.

45. Waxaad sheegtaa xayawaannada ku nool Gobolka cirifka (Gobollada qaboobaha ah)?

✓ Xayawaannada ku nool waxaa ka mid ah:-

- Dubbiga
- Shimbiraha batriigga.

46. Waxaad sheegtaa ahmiyada dhaqaale ee Gobolka cirifka (Gobollada qaboobaha ah)?

✓ Ahmiyada dhaqaale ee Gobolka cirifka (Gobollada qaboobaha ah)

- Mehradda ugaarsiga xayawaannada dhogorta leh
- Dhaqashada xayawaanka rinnada.

47. Sheeg gobollada ay Soomaaliya ka tirsan tahay?

✓ Waxa ay Soomaaliya ka tirsan tahay Gobollada Kulaaleyda ah.

CASHARKA 4^{aad}: NOLOSHA, DHIRTA IYO XAYAWAANNADA SOOMAALIYA.

1. Dhammaan muuqaallada kala duwan ee dhulka maxaa hu' u ah oo ku dahaaran?

✓ Dhammaan muuqaallada kala duwan ee dhulka waxaa hu' u ah oo ku dahaaran dhir siinaysa muuqaal qurxoon, isla markaana ku deeqeyso daaq iyo kheyraad alwaax iyo xaabo ah.

2. Maxaa ka mid ah waxyaabaha horseedayo cufnaanta dhirta dabiiciga ah ee gobollada koonfureed?

✓ waxyaabaha horseedayo cufnaanta dhirta dabiiciga ah ee gobollada koonfureed waxaa ka mid ah:-

- Saamiga heerka huurka oo aad u sarreeyo.
- Roobabka oo badan.
- Dhulka oo carro san ah dhumuceeda ay aad sarreeyso.

3. Maxaa keenayo in dhulkii muddo kooban ka hor ahaa dhul kaymo iyo cows leh oo isu beddelayo dhul qallalan oo lama degaan ah oo aan wax ka bixi karo ah lahayn.

✓ Waxaa keenayo arrimahaan waxyaabaha soo socda:-

- Isticmaalka aan loo meel dayin ee xoolo dhaqatada, beeraleyda, ganacsatada, jaridda iyo gubidda geedaha ee joogtada ah, iyadoo looga dan leeyahay arrimaha soo socda:

- Isticmaalka maxalliga ah eek ala duwan sida dhuxusha iyo dhismaha, taa oo ay sii dheer tahay in xoolo dhaqatadu mararka qaar ay gubaan geedaha si ay ugu baqdin geliyaan xayawaannada ugaarsada iyo in ay ka fogeeyaan xoolahooda.
- In la soo saaro dhuxusha dhirta laga sameeyo si loogu geddis geeyo seyladaha dibadda, gaar ahaan intii lagu jiray muddadii ka dambeesay burburkii dowladda dhexe ee Soomaaliya.
- Deeqsiga xad dhaafka, arritani waxay saameysay laxaad leh ku yeelatay dhirta ku habboon daaqsinka, waxayna hoos u dhigtay qeybaheeda taranka xoolaha oo badan awgeed.
- Isbeddelka cimilada, halkaa oo ay dalka ku soo laa laabatay abaaro iyo biyo yari.

- Duulaannada isdabajooga ah ee ayaxa waxay keentay in ay baaba'do tiro aad u badan oo dhirta dabiiciga ah.

4. Waxaad sheegtaa waxtarka dhirta dabiiciga ah ee dalka Soomaliya?

✓ Waxtarka dhirta dabiiciga ah ee dalka Soomaliya waxaa ka mid ah:-

- Dhirta waxaa loo tixgeliyaa inay ka mid tahay ilaha ugu muhiimsan ee lacafka Soomaaliya, maaddaama ay mateleyso 98% wadarta ilaha calafka ee dalka.
- Kala duwanaanta dhirta ee xagga nooca iyo cufnaanta waxay saameyn ku leedahay hannaanka filiqsanaanta iyo noocyada xayawaannada ee dhulka Soomaaliya. Dhexdiisa.
- Dhirta waxay carrada ka ilaalisaa carro guurka iyo xarfashada, sidoo kale waxay carrada siisaa waxyaabaha Orgaanigga ah, taa oo lagu tilmaamo waxa ugu muhiimsan waxyabaha ay carradu ka kooban tahay.

5. Immisa ayay mataleysaa boqolkiiba dhirta wadarta ilaha calafka ee dalka Soomaliya?

✓ Waxa ay matalaysaa 98% wadarta ilaha calafka ee dalka Soomaliya.

6. Immisa ayuu gaaraysaa bedka daaqsinta ah ee dalka Soomaaliya?

✓ Bedka daaqsinta ee dalka Soomaaliya waxa uu gaaraysaa ku dhawaad 28.65 malyan hektaar, bedkani wuu ballaaranayaa sanadaha oo roobku badan yahay waxayna gaari kartaa ilaaa 36 malyan oo hektaar.

7. Immisa ayaa lagu qiyaasaa tirada duunyada dalka Soomaaliya?

✓ Waxa lagu qiyaasaa 39.64 malyan oo neef ah.

8. Waa maxay laba qoddob aynu ku arki karno ahmiyadda kheyraadkka ama waaxda xoolo dhaqashada Soomaaliya iyo wax soo saarkooda?

✓ Laba qoddob aynu ku arki karno ahmiyadda kheyraadkka ama waaxda xoolo dhaqashada Soomaaliya iyo wax soo saarkooda waxa ay kala yihiin:-

- Ahmiyadda xagga cunnada.
- Ahmiyadda dhaqaale.

9. Ka hadal ahmiyadda xagga cunnada ee xoolo dhaqashada?

✓ Guud ahaan dadka Soomaaliyeed waxay si weyn ugu tiirsan yihiin cunnooyinka ka soo jeeda wax soo saarka xoolaha sida hilibka iyo caanaha (cad iyo caano), gaar ahaanna xoolo dhaqatada, kuwaa oo aynu dhihi karno dhammaan waxay ku tiirsan yihiin wax soo saarka xoolaha, sidoo kale barootiinka xoolaha waxaa lagu tiriyaa mid lagama maarmaan u ah cunno kasto oo dheeli tiran.

10. Ka hadal ahmiyadda dhaqaale ee xoolo dhaqashada?

✓ Ahmiyadda dhaqaale waxaa ka mid ah:-

- Kaalintooda xagga dibbadda: waxaa lagu tiriyaa xoolaha iyo wax soo saarkooda waxyaabaha ugu muhiimsan oo ay dhoofiyaan dadka Soomaaliyeed, waxay la gaar tahay kaligeed ku dhawaad 80% wax dhoofinta guud ee Soomaaliya gaar ahaan sanadaha qaar.
- Xoogsiga (shaqada): waxaa ka xoogasada ku dhawaad 60% dadka Soomaaliyeed.
- Saami ahaan waxay ka tahay wax soo saarka maxilliga ah ee dalka 50%, ama waxa loo yaqaan wax soo saarka guud ee qaranka (GDP).
- Waxaa sarreeya waxa ku soo aadayo qofkiiba oo xoolo dhaqato ah marka loo qeybiyo dadka Soomaaliya taa oo aad ugu sarreysa dalalka kale.

Su'aalo & Jawaabo

Cutubka #3 DADKA IYO DEEGAANKA

Casharka 1aad: KALA DUWANAASHIYAHA DEEGAANNADA DUNIDA

1. Waa maxay kala duwanaashiyaha deegaanka?

✓ Kala duwanaashiyaha deegaanka waxaa loola jeedaa kala duwanaashiyaha noolaha, sida kala duwaanaashiyaha qaab dhismeedka hiddo sidaha dhirta iyo xoolaha iyo kala duwanaanta hab dhaqanka.

2. Maxaa khatar ku ah kala duwanaashiyaha deegaanka?

✓ Kala duwanaashiyaha deegaanka waxaa khatar ku ah dabargo' ka dhashay si xun u adeegsiga ilaha dabiiciga ah sida isticmaalidda kiimikaalka laaya cayayaanka si looga ilaaliyo dalagga iyo wasakheynta biyaha webiyada iyo badaha intaa waxaa dheer dhismaha iyo warshadaha.

3. Waa maxay dhibka ugu badan ay wajaha deegaanka?

✓ Dhibka ugu badan ay wajaha deegaanka waa hoos u dhac ku yimid xayawaanka iyo dhirta.

Casharka 2aad: DHIBAATADA DEEGAANKA IYO SAAMEYNTA AY KU LEEDAHAY DUNIDA

1. Waa maxay khatarta deegaan ee aadanaha halis gelin karta?

✓ Khatarta deegaan ee aadanaha halis gelin karta:

- Wasakheynta beeraha.
- Roobka aashitada wata.
- Kororka dadka.
- Kala duwanaashiyaha noolaha oo luntay.
- Haraaga guryaha iyo warshadaha.

- Macdan qodashada.
- Baaba'a ilaha dabiiciga.
- Dhibaatooyinka nukliyeerka.
- Fiditaanka magaalooyinka.
- Haraaga xarumaha caafimaad
- Wasakhowga ilaha biyaha.
- Musiibooyinka dabiiciga ah.
- Qashinka iyo qashin qubka.

2. Waa maxay saameynta ay ku leedahay jiilka soo socda dhibaatooyinka deegaanka?

✓ Saameynta ay ku leedahay jiilka soo socda dhibaatooyinka deegaanka:

- Waa in ay u keento cudurro iyo dhibaatooyin oo aan waligood xal ku haboon loo helin sida tusaale ahaan Haraaga Nucliyeerka oo ku jira maadooyin aan baabi'in waligood.

3. Waa maxay saameynta ay ku leedahay ku intifaaca ilaha dabiiciga ah dhibaatada deegaanka?

✓ Saameynta ay ku leedahay ku intifaaca ilaha dabiiciga ah dhibaatada deegaanka waxaa ka mid sida:

- Biyaha macaan oo inta badan dunida waxaa gaaray wasakhoobid waxaa intaas dheer in si aan wanaagsaneyn loo isticmaalo.
- Sidoo kale dhul beereedka barwaaqada ah ayaa waxaa ku fidaya deegaankii iyadoo meela fara badan oo dunida ah ay ka cabanayaan in si aan wanaadsan loo maalgashan dhulkaas.
- Sidoo kale weli waxaa gaabis ku jira ka faa'iideysiga tamart waxyaabaha waxyeellada u geysta deegaanka taasna way ka mid tahay.

4. Waa maxay saameynta ka dhalan karta dhibaatada deegaanka?

✓ Saameynta ka dhalan karta dhibaatada deegaanka waxaa ka mid ah:

- Wasakhowga hawada.
- Wasakhowga biyaha.
- Wasakhowga carrada.
- Isbeddelka cimilada.
- Heerkulka dunida oo kordho.
- Keymaha oo la baa'biyo.
- Isbeddelka Hiddaha.
- Saameynta noolaha badda.

5. Sheeg qaababka wasakhowga hawada?

✓ Qaababka wasakhowga hawada waxaa ka mid ah:-

- walxo adka ah oo hawada gala.
- Walxo hawo ah: sida qiiqa sumaysan.
- Walxo bakteeriyo iyo jeermis ka kooban.
- Shucaaca atoomiga dabiiciga ah iyo warshadaha.

CASHARKA 3^{aad}: DHIBAATADA XAALUFKA DHIRTA, SABABEHEEDA IYO SIDA LAGU XALLIN KARO.

1. Waa maxay xaaluf?

✓ Xaalufku waa hoos u dhac ku yimaada carrada dhulalka qallalan iyo dhulka biyaha leh, taasoo ka dhalatay isbeddelka cimilada ama howlaha Aadanaha ay ka sameeyaan deegaanka.

2. Goormuu dhacay shirkii Qaramada Midoobay ee koowaad oo lugu qaada dhigaayay arrimaha deegaanka?

✓ Waxa uu dhacay sannadkii 1972dii.

3. Halkee ayuu ka dhacay shirkii Qaramada Midoobay ee koowaad oo lugu qaadadhigaayay arrimaha deegaanka?

✓ Wuxuu ka dhacay magaalada Istookhom.

4. Immisa sababood ayuu ku dhashaa xaalufka?

✓ Xaalufka waxa uu ku dhashaa labo sababood oo kala ah:-

- Sababaha dabiiciga ah
- Sababaha aadanha la xiriira.

5. Sheeg sababaha dabiiciga ah ee Xaalufka?

✓ Sababaha dabiiciga ah ee Xaalufka waxaa ka mid ah:

- Xaddiga roobka oo yaraado iyo abaaro is daba jog ah.
- Dhir la'aantu waxay yareysaa uumi baxa, waxana ka dhasha roob yari iyo carra guur yareeya miradhalka dhul beereedka.
- Carra guur ka dhasha dabeysha iyo daadadka.
- Carra siqidda ama carra guurka ka dhaca meelaha biyaha yar ama biya la'aanta ah waxaa uu ka mid yahay walxaha sababa xaalufka.
- Siqidda bacaad buura ah.

6. Sheeg sababaha Aadanaha la xiriira ee Xaalufka?

✓ Sababaha Aadanaha la xiriira ee Xaalufka waxaa ka mid ah:-

- Cadaadiska deegaanka kaga imaanaaya dadka.
- Qaab beerashada aan saxneyn.
- Si xun u adeegsiga ilaha dabiiciga ah.

7. Maxaa ka mid ah qaababka loo xallin karo Xaalufka?

✓ Qaababka loo xallin karo Xaalufka waxaa ka mid ah:-

- In la joojiyo hab beerashada deegaanka khatarta ku ah iyo adeegsiga habka carrada xiriirka la leh.
- Adeegsiga tamarta cusboonaata.
- In laga howgalo kobcinta waxsoosaarka beeraha iyo kordhinta barwaaqada carrada.
- Faafinta wacyi deegaanka xafida.
- Ilaalinta dhirta.

- Adeegsiga nidaam ilaalin kara ilaha biyaha.

8. Maxaa ka mid ah wadiiqooyinka looga hortaggo bacaad guurka?

✓ Wadiiqooyinka looga hortaggo bacaad guurka waxaa ka mid ah:-

- Wadiiqada makaanikada.
- Iyo qaabka kiimikada.

9. Immisa qeybood ayaa loo qeybiyaa wadiiqada makaanikada?

✓ waxaa loo qeybiyaa laba qeybood oo kala ah:-

- Teed dhireed.
- Teedadka adag.

Casharka 4aad: DHIBAATADA XARFASHADA CARRADA IYO DAADADKA KA DHACA DEEGAANKA

1. Maxaa ka mid ah sababaha xarfashada carrada?

✓ Sababaha xarfashada carrada waxaa ka mid ah:-

- Baabi'inta dhirta hakin laheyd bacaadka.
- Waxyaabaha carra guurka keena sida roobkaiyo dabeylaha.
- Daaqa oo aan loo meel dayin oon si wanaagsan loo maaraynin.
- Habdhaqanka Aadanaha guracan ee u adeegsiga carrada dhismaha, taas oo sababi karta in ay togag samaysmaan iyo biya degaanno kor u qaadi kara suurtagalnimada carraguur inuu dhaco.
- Tallaaboyinka qaldan oo ay qaadaan qaar ka mid ah beeralayda.

2. Waa immisa noocyada xarfashada carrada?

✓ Waa laba nooc noocyada xarfashada carrada.

3. Waa maxay laba nooc ee xarfashada carrada?

✓ Laba nooc ee xarfashada carrada waa:-

- Xarfashada ay Dabeysha keento.
- Xarfashada ay Biyaha keenaan.

4. Waa maxay xarfashada ay Dabeysha keento?

✓ Xarfashada ay Dabeysha keento waa xarfashada ka dhalata dabeylahaa iyo duufaannada oo carrada qaadda saameynta ay ku leedahay caradana waxay ku xirantahay hadba awoodda dabeysha.

5. Waa maxay xarfashada ay Biyaha keenaan?

✓ Xarfashada ay Biyaha keenaan waa xarfashada ka dhalata socodka biyaha ama dhibcaha biyaha markay ku dhacaan carrada.

6. Waa maxay qaababka loo yareyn karo xarfashada biyaha?

✓ Qaababka loo yareyn karo xarfashada biyaha:-

- In la sameeyo bacaad celin iyada oo la sameynayo dayr lana celinaayo bacaadka.
- In la sameeyo cilmi baaris buuxda oo ku aaddan sababaha xarfashada iyo sida looga hartagi karo.
- In la beero dhir korna loo qaado dhireenta iyadoo la beerayo dhirta biya yarida u dulqaadka badan.
- In la yareeyo dhibaatada dhulka janjeera iyadoo la dhisayo jaranjarooyin.
- In meel lagu ururiyo biyaha iyo daadadka loogana faa'iidaysto lana xakameeyo iyadoo la dhisaayo barkado iyo biyo xireeno si loo yareeyo awoodda biyaha.
- In la sameeyo meel lagu xanaaneeyo ariga iyo lo'da lana baro beeraleyda qaab falidda ku habboon iyo waqtiga ku habboon.

7. Waa maxay dhibaatooyinka ama masiibooyinka ka dhalan kara daadadka?

✓ Dhibaatooyinka ama masiibooyinka ka dhalan kara daadadka waxaa ka mid ah:-

- Khasaarooyin naf iyo maal.
- Dhulka oo go'o
- Dhul beereedka iyo xoolaha oo waxyeello soo gaarto.
- Carro guur.

- Shaqada oo caqbad ay ku timaado.

8. Waa maxay sababaha keena daadadka?

✓ Sababaha keena daadadka waxaa ka mid ah:-

- Carrada oo awoodi wayso in ay dhuuqdo biyaha xad dhaafka ah.
- Deegaanka oo ku fida meelaha daadadka baylaha u ah iyadoon la qaadin tallaabooyin ka hortag ah.
- Tubbooyinka biyaha qaada oo ciriiri noqda ama dayac ku yimaada dartiis oo awoodi waaya in ay biyaha si habsami leh u qadaan.
- Haraaga qalabka dhismaha iyo burburka waddooyinka.
- In aan laga sameyn meelaha la deggan yahay goobo biyaha lagu neefiyo oo ku filan.
- Dhismayaasha aan nidaamsaneen oo laga dhiso meelaha biya mareenada ah iyo goobaha u dhow webiyada.
- Dhoobada iyo wasakhda iyo dhirta xirta meelaha biyaha maraan.
- Burburka gabiyada biya wadeenada oo ku fida deegaannada.

9. Maxaa ka mid ah tallaabooyinka looga hortagi karo daadadka?

✓ Tallaabooyinka looga hortagi karo daadadka waxaa ka mid ah:-

- Tira koobka meelaha daadadka khatarta ugu jira iyo in la sameeyo khariido qaran oo lagu muujinaayo.
- Daryeel goobaha daadadka u nugul iyo in kaga sameeyo biyo xireeno iyo tubbooyin ka fogeeya deegaannada iyo goobah ganacsi.
- Illaalinta magaalooyinka.
- In dadka loo jiheeyo ka faa'iideysiga dhul beereedka.
- In la helo agab bixiya digniin xilli hore, dadkana la dareensiiyo khatarta burburka biya xireennada iyo in la helo qorshooyin lagu ilaalin karo nafta iyo hantida dadka.

Casharka 5aad: DHIBAATADA DEEGAANKA SOOMAALIYA

1. Waa maxay deegaan?

✓ Deegaan waa waxa ku hareeraysan Aadanaha oo ay ka mid yihiin wax allaale iyo waxa dunida dusheeda saran.

2. Waa maxay dhibaatooyinka haysta deegaanka soomaaliyeed?

✓ Dhibaatooyinka haysta deegaanka soomaaliyeed waxaa ka mid ah:-

- Jaridda dhirta.
- Duugista waxyaabaha haraaga ah ee kiimikada.
- Abaaraha iyo daadadka oo soo lab laabta.

3. Waa maxay abaar?

✓ Abaar waa xaalad ka dhalatay hoos u dhac ku yimaado roobka mudo dheer.

Su'aalo & Jawaabo

Cutubka #4 JUQRAAFIGA SOOMAALIYA

Casharka 1aad: Halka ay Soomaaliya dunida kaga taal iyo Sohdimaheeda

1. Goobta Falaki ahaan maxay tilmaameysaa?

✓ Goobtu Falaki ahaan Waxay tilmaameysaa halka dowladi ay kaga dhacdo dhulka, sidoo kale halka ay dhacdo iyadoo loo eegayo dhammaan Loolalka iyo Dhigaha.

2. Yaa muhiimsan Loolalka iyo Dhigaha? Sheeg sababta?

✓ Loolalka waxay ka muhiimsan yihiin Dhigaha, sababtoo ah waxay tilmaamayaan heerka ka fogaan ama u dhowaanta dhul-badhaha iyo xiriirka kala dhexeeyo cimilada ka jirto dowladdaas dhexdeeda.

3. Intee dhacdaa Jamhuuriyadda Soomaaliya?

✓ Jamhuuriyadda Soomaaliya waxay dhacda inta u dhaxeysa Loolka **2°** Koonfurta iyo Loolka **12°** Waqooyi badhaha.

4. Sheeg dalalka uu xuduuda la yahay dalka Soomaaliya?

✓ Soomaaliya waxay deris la tahay dhammaan dalka Jabuuti oo dhanka Waqooyiga kaga began, kaa oo ay wadaagaan xuduud dherer ahaan gaareysa **58km**, Kiinya oo dhanka koonfureed kaga began kaa oo ay wadaagaan xuduud dherer ahaan gaareysa **678km**, ugu danbeyn waxay xuduud aad u dheer oo gaareysa **1590km** la wadaagtaa dalka Itoobiya oo kaga began dhanka Galbeed.

5. Sheeg sababta xadka dalka Soomaaliya iyo dalalka deriska la ah uu uga mid yahay xuduudaha Afrika kuwa uga xasaasisan uguna dhibaatooyin badan?

✓ Sababtuna waxay tahay Loolalka ka dhaxeeya Soomaaliya iyo labada dal ee Itoobiya iyo Kiinya ee ku saabsan gobolka Soomaali galbeed ee raacsan

Itoobiya iyo Gobolka Waqooyi bari ee raacsan Kiinya, taa oo ay sii dheertahay Loolalka kaalinta siyaasadeed mandiqada geeska Afrika ee ka dhaxeeya Soomaaliya iyo Itoobiya, Soomaaliya waxay madax-bannaani qaadatay iyadoo ay colaad kala dhaxeyso dalalka gobolka gaar ahaan kuwa deriska la ah.

6. Immisa qeybood ayaa loo qeybiyaa dalalka ayadoo loo tixgelinaayo goobta beriga iyo biyaha halka dal uu kaga dhaco qaaradaha iyo badaha ama ila biyoodyada?

✓ Waxaa loo qeybiyaa saddex qeybood waxayna kala yihiin:-

- Dalal aan bad lahayn oo kaliya dhul berry ahna ku wareegsan yahay oo aan lahayn qaab ay ula xiriirto dunida bannaanka ah
- Dal jasiirado ah
- Iyo dal bad iyo beri kulmiya kana wanaagsan kuwa hore.

7. Markii loo fiiriyo berriga iyo biyaha maxaad lagu tiriyaa dalka Soomaaliya?

✓ Dalka soomaaliya waxaa lagu tiriyaa dal kulmiya bad iyo berry intaba, Soomaaliya waxay leedahay dhul berry ah oo aad u ballaaran oo ku yaal Bariga Afrika guud ahaan, gaar ahaanna Geeska Afrika.

8. Waa immisa bedka guud ee dalka Soomaaliya?

✓ Bedka guud ee dalka Soomaaliya waa **637,657 km^2.**

9. Immisa ayay gaaraysayaa dherer ahaan xeebta dhulka Soomaaliya?

✓ Xeebta dhulka Soomaaliya waxay gaaraysaa dherer ahaan **3333km**.

10. Maxaa ka mid ah waxyaabaha Soomaaliya u horseeday inay noqoto meel Istiraatiiji ah?

✓ Waxyaabaha Soomaaliya u horseeday inay noqoto meel Istiraatiiji ah waa:-

- Soomaaliya waxay qeyb ka tahay dhulka carabta ee baaxada weyn kaa oo dhaco dhul juqraafi ahaan aad istiraaji u ah marka la eego khariidada dunida, waxayna ku taalaa meel bartamaha u ah dunidii hore, waana dhul kaabad ah ama buundo

ah taa oo isku xireyso saddexda qaaradood ee waaweyn: Aasiya, Afrika iyo Yurub

- Waxaa lagu tiriyaa Soomaaliya in ay dhacdo marinka dabiiciga ah ee loo maro bartamaha Afrika, dhul badhaha iyo kulaaleyda si guud iyo bariga Afrika si gaar ah.
- Sidoo kale waxaa la rumeysan yahay in Soomaaliya ay tahay halka uu Islaamku kasoo galay bartamaha iyo bariga Afrika, maxaayeelay hijradii ugu horeesay Muslimiinta waxaa la rumeysan yahay in ay u soo jiheysteen Geeska Afrika.
- Sidoo kale waxay u taagan tahay isku xirka qaaradaha gaar ahaan waddooyinka ganacsiga caalamiga ah laga soo bilaabo Badweynta Hindiya, Badda Cas, kanaalka Suweys, ugu dambeyn Badda dhexe.

11. Immisa gobol ayay ka koobantahay Soomaaliya?

✓ Soomaaliya waxay ka koobantahay **18 Gobol.**

12. Gobolladii ugu dambeeyay xilligii dowladdii dhexe ee Soomaaliya waxay ahaayeen 18 Gobol. WAANA SIDA HOOS KU QORAN IYO MAGAALA MADAXYADOODA:-

GOBOLKA		**MAGAALO MADAX**
1.	Awdal	Boorama
2.	Waqooyi Galbeed	Hargeysa
3.	Tokdheer	Burco
4.	Sanaag	Ceerigaabo
5.	Sool	Laascaanood
6.	Bari	Boosaaso
7.	Nugaal	Garoowe
8.	Mudug	Gaalkacyo
9.	Galgaduud	Dhuusomareeb

10.	Hiiraan	Beledweyne
11.	Shabellada dhexe	Jowhar
12.	Banaadir	Muqdishu
13.	Shabeellada hoose	Marka
14.	Bakool	Xudur
15.	Bay	Baydhabo
16.	Gedo	Garbahaareey
17.	Jubbada dhexe	Bu'aale
18.	Jubbada hoose	Kismayo

13. Waa maxay muhiimadda ay Badda ay u leedahay dalka?

✓ Muhiimadda ay Badda ay u leedahay dalka waxaa ka mid ah:-

- Waa hannaan dalka uu kula xiriiri karo dunida inteeda kala isagoo aan usii marin dal kale.
- Waxay kor dhineysaa il-baxnimada dalka maadaama uu si fudud kula xiriiri karo dalalka kale.
- Baddu waxay leedahay Kheyraad aad u kala duwan.

Casharka 2aad: Muuqaallada Oogada Dhulka Soomaaliya

1. Ma isku mid baa kala sarreynta dhulka Soomaaliya?

✓ Kala sarreynta dhulka Soomaaliya waa kala jaad.

2. Maxaa ku yar oogada sare ee dhulka Soomaaliya?

✓ Oogada dhulka Soomaaliya waxaa ku yar buuraha ama dhulka jooggiisu sarreeyo.

3. Immisa ayuu gaarayaa celceliska joogaga ugu sareeyo dhulka Soomaliya?

✓ Celceliska joogaga ugu sareeyo dhulka Soomaliya waxa uu gaarayaa $\mathbf{1000}\boldsymbol{m}$.

4. Immisa qeybood ayaa loo kala saari karaa oogada sare ee dhulka Soomaaliya?

✓ Si guud oogada sare ee dhulka Soomaaliya waxaynu u kala saari karnaa saddex qeybood waxayna kala yihin:-

- Jiidda dulaha ah
- Jiidda Banaannada
- Jiidda Buurleyda.

5. Dhulka Soomaliya **3 meelood meel** maxaa ku dahaaran?

✓ Dhulka Soomaliya **3 meelood meel** waxaa ku dahaaran cad dhuleed dul ah, taa oo ka soo foorarta dhanka Waqooyi-galbeed ilaa dhanka Koonfur-bari, foorar tartiib tartiib ah.

6. Immisa ayuu gaarayaa celceliska joogga cad dhuleed dulka ah ee ku dahaaran dhulka Soomaaliya saddex meelood meel?

✓ Waxa uu gaarayaa **200m**

7. Immisa qeybood ayay u qeybiyeen webiyada jiida dulaha ah?

✓ Waxa ay u qeybiyeen saddex qeybood oo kala ah:-

- Dusha waqooyi.
- Dusha dhexe.
- Dusha koonfureed.

8. Waa maxay astaamaha Dusha Waqooyi?

✓ Dusha Waqooyi waxaa soo dhexgelayo tiro badan oo meelo dhul hoose ah iyo xolxollo, kuwaa oo ay sababtay carro guurka meelaha dhulka uu ka jilicsan yahay ku dhacay ee oogada sare dul dhuleedkaan.

- Astaanta ugu weyn ee dhul duleedkaan waxaa weeye in ay tahay Oomane, gunbur dhadhaabeed, buuro iyo tuulimaad bataax ah.

9. Waa maxay astaamaha Dusha Dhexe?

✓ Dhul duleedka dhexe waxaa tilmaan u ah in ay tahay mid ay oogadeeda sare siman tahay,

- inkastoo ay soo dhexgalayaan xooggaa gunburro iyo bataaxyo ah,
- Sidoo kale waxaa laga dhex helaa qururaxyo filiqsan oo leh qaab gunbur oo kale ah.

10. Waa maxay astaamaha Dusha Koonfureed?

✓ Dusha Koonfureed waa qeybta ugu hooseysa uguna siman xagga dhulka dalka.

11. Waqooyi iyo Koonfur halkee ayay ku yar yihiin banaanada ee dalka Soomaaliya?

✓ Waxa ay bannaanada ku yar yihiin Waqooyi.

12. Waa maxay arrimaha keena kulaylka iyo huurka ee dalka Soomaaliya?

✓ Arrimaha keena kulaylka iyo huurka ee dalka Soomaaliya waa arrimaha soo socda:-

- Bannaanada oo hooseeya marka loo eego dul duleedka.
- Soomaaliya oo dhacda dhulka kulul.
- Neecaawda badda oo aanan gudaha bannaanada soo geleynin gaar ahaan meel fog.

13. Immisa ayuu gaarayaa ballaca jiidan ee buuralayda ah ee daafaheeda Waqooyi?

✓ Waxa uu gaarayaa **100km** daafaheeda waqooyi.

14. Immisa ayuu gaarayaa ballaca jiidan ee buuralayda ah ee daafaheeda Koonfur?

✓ Waxa uu gaarayaa **25km** daafaheeda Koonfur.

15. Maxaa matalayo jiidda buuraleyda Soomaaliya?

✓ Jiidda buuraleyda Soomaaliya waxaa matalayo taxanaha buuraleyda ah eek u fidsan daafaha Waqooyi ee gobolka waqooyi ilaa dooxada Nugaal dhanka Koonfureed.

16. Maxaa loo yaqaan taxana buureedka laga dhex helo guda buuraha?

✓ Waxaa loo yaqaan Goolis.

17. Immisa ayay dhacdaa jog ahaan Magaalada Sheekh?

✓ Waxay dhacdaaa joog gaarayo **5000 foodh (cag**).

18. Immisa ayuu gaaarayaa celceliska jooga buuraleyda jiidan?

✓ Waxa uu gaarayaa inta u dhaxeesa **5000-6000 foodh** joogga badda.

19. Sheeg burta ugu dheer buuraha dalka Soomaaliya?

✓ Waa buurta Suurad

20. Immisa ayuu gaarayaa jooga buurta Suurad?

✓ Waxa uu gaarayaa **2800km** joogga buurta Suurad

F.G: Jiidda Buuraleyda Soomaaliya waa jiidd akaliya oo oogadiisa uu sameynayo cimilada gaar ahaan xaddiga roobka kaa oo si xoog badan u kordhayo buuraleydaaan dhexdooda marka la barbar dhigo jiidaha banaannada iyo dulaha

Casharka 3aad: Cimilada Soomaaliya

1. Sheeg shanta waxyaabood ay saameynta ku leh cimilada dhulka Soomaaliya?

✓ Shanta waxyaabood ay saameynta ku leh cimilada dhulka Soomaaliya waa:-

- Xilliga ay cadceeddu dul istaageyso.
- Joogga dhulka iyadoo loo eegayo heerk joogga badda.
- Halka ay xeebta u jeeddo iyadoo loo eegaayo jihada dabaylaha mansuunka ah.
- Filiqsanaanta biyaha iyo berriga.
- Cufnaanta dhirta.

2. Immisa darajo ayay heerkulka gobollada xeeb ka fogga ah uu ka yar yahay heerkulka gobollada xeebta ka hooseeya?

✓ Waa toban darajo.

3. Immisa ayuu xaddiga roobka ee dhulalka xeebaha ka hooseeyaa xaddiga roobka ee dhulka buuraleyda galbeed?

✓ Waxa uu ka hooseeyaa **425mm.**

4. Immisa ayuu xaddiga roobka ee dhulalka xeebaha ka hooseeyaa xaddiga roobka ee buuraleyda Waqooyi-galbeed?

✓ Waxa uu ka hooseeyaa **500mm.**

5. Immisa ayuu xaddiga roobka ee dhulalka xeebaha ka hooseeyaa bannaan xeebeedka bari?

✓ Waxa uu ka hooseeyaa **75mm.**

6. Immisa mar ayay Cadceedu dul istaagtaa ama ku qotontaa dhulka Soomaaliya Sannadkii?

✓ Cadceeddu waxay dul istaagtaa ama ku qotontaa dhulka Soomaaliya Sannadkii labo mar oo kala ah:-

- Bisha Abriil
- Iyo billowga bisha Sebtember.

7. Maxaa ka dhalanayo labada xilli cadceedu ay noqoneyso mid ku qotonta dhulka Soomaaliya?

✓ Waxaa ka dhalanayo arrintaa heerkulka oo kor u kaca, mana qabooba dhulka marka laga reebo dhulka uu jooggiisa sarreeyo sida buuraleyda Goolis iyo meelaha badda.

8. Halkee ayuu ku kordhaa huurka?

✓ Huurka waxa uu kordhaa marka aynu joogno meelaha xeebaha si la dareemi karo.

9. Halkee ayuu hoos ugu dhacaa huurka?

✓ Huurka waxa uu hoos u dhacaa meelaha xeeb ka fogga ah, gaar ahaan meelaha joogga sare leh.

10. Muxuu sababaa saamiga jawiga huurka oo sareeya?

✓ Saamiga jawiga huurka oo sareeya wuxuu keenayaa in si xooggan loo dareemo heerkulka iyo in cimilada noqoto mid aan habbooneyn.

11. Maxaa lagu tilmaamaa cimilada dhulka Soomaaliya?

- ✓ Cimilada Soomaaliya waxaa lagu tilmaamaa in ay tahay Oomane iyo Oomane xigeen.

12. Maxaa sababa abaaraha dhulka Soomaaliya?

- ✓ Abaaraha dhulka Soomaaliya waxay ka dhashaan roobka oo yaraado xaddi ahaan ama ka soo dib dhaco xilligii uu di'ijiray sanadaha qaarkood.

13. Maxaa ka mid ah dhibaatada ka dhalanayso abaaraha dhulka Soomaaliya?

- ✓ Waxaa ka mid ah:-
  - Waxaa qallaalayo daaqii.
  - Waxaa la weynayaa biyihii
  - Waxaa dib u dhacayo xilligii dhirta ay soo bixi jirtay
  - Waxaa baaba'aya tiro badan oo xoolo ah.

14. Goormaa ayay dhacaan daadadka dalka Soomaaliya?

- ✓ Daadadka dalka Soomaaliya waxay dhacaan abaar kasta kadib, Koonfurtaba ha ugu badnaatee.

15. Maxaa sababa daadadka ka dhaca dhulka Soomaaliya?

- ✓ Waxaa sababa daadadka qulqulka webiyada jubba iyo shabeelle si ka duwan dooxooyinka mansuunka ee Waqooyiga oo ku aaddan xilliga ay labada wabi ay fatahaan
  - Waxyaabaha keenayo daadadka waxaa kaloo ka mid ah daryeel xumada iyo keydin la'aanta biyaha inta lagu jiro xilli roobaadka si looga faa'iideysto xilliyada ay biyuhu yaryihiin ama ay abaarta tahay iyo in laga hortago halista ka imaanayso daadadka.

16. Maxaa ka mid ah waxyaabaha ka dhasha abaaraha iyo daadadka?

- ✓ Waxaa ka dhasha dhibaatooyin dhaqaale, bulsho, siyaasadeed iyo kuwa deegaanka la xiriira.

- Waxaa ka dhasha in ay yaraato dhirta taa oo kadibna saameyn ku yeelatay shacabka Soomaaliyeed, maxaa yeelay noloshooda waxaa udub-dhexaad u ah xoolaha.
- Waxaa hooos u dhacay kororka dabiiciga ah ee dadka Soomaaliyeed.
- Sidoo kale waxay hor istaageen qorshooyin qarameedka looga gol leeyahay in lagu horumariyo nolosha dadka reer-guuraaga ah.
- Waxaa ka dhasha barakac baahsan culeys weyn ku ah dhaqaalaha dalka oo markiisii horaba aad u tabar yaraa.
- Sidoo kale waxaa ka dhalan karo cudurada faafa maadaama aysan ka jirin nadaafada xooggan meelaha ay degganyihiin dadka barakacayaasha ah.
- Sidoo kale waxaa ka imaan kara faragelin siyaasadeed in lagu sameeyo arrimaha gudaha ee dalka iyadoo lagu marmarsiyoonayo xaalad bini aadamnimo.

17. Isbarbar dhig magaalooyinka xeebaha iyo kuwa xeeb ka fogta ah adigoo u eegayo huurka

✓ Magaalada Muqdishu celceliska sannadeedka huur wuxuu gaarayaa **72%**

- Magaalada Hargeysa celceliska sannadeedka huur wuxuu gaarayaa **60%**
- Magaalada Kismaayo celceliska sannadeedka huur wuxuu gaarayaa **71%**

Casharka 4aad: Dadka Soomaaliyeed

1. Maxaa ka mid ah sababaha dabiiciga ah iyo kuwa aadanaha la xiriiro awgeed in la tilmaamo tirrada dadka Soomaaliya si dhammeystiran ay tahay aarrin aad u adag, haddaysaba ahayn mid suura gal ah?

✓ Waxaa ka mid ah:-

- Mehradda ay ka xoogsadaan dadka Soomaaliyeed inta badan oo ah xoolo dhaqashada iyo in ay raadinayaan daaq iyo biyo.

- Qeyb badan oo ka mid ah dhulka Soomaaliya oo lama degaan ah, isla markaana ay ku yar yihiin magaalooyinka aadna u kala fog.
- Isgaarsiinta oo aad u liidata gaadiid xumo iyo wadooyinka oo iyagana aad baaba'san.
- Qoris aqris la'aanta dadka Soomaaliyeed oo aad u sarreysa.
- Wacyi yarida la xiriira muhiimmada tiro koobka taa oo ay la wadaagaan dunida saddexaad.
- Khibrad yarida la xiriirta habka iyo agabka tiro koobka dadka.
- Xasillooni darrada dalka ka jirta laga soo bilaabo xilligii madax-banaanida ilaa maantaan aynu joogno.
- Qalalaasaha iyo dhibaatooyinka xagga xuduudda ee ka dhexeeya Soomaaliya iyo dalalka deriska la ah Kiinya iyo Itoobiya iyo dadka oo aan aqoonsaneyn xuduudahaan isla markaana si joogot ah isugu gudbayo.
- Wacyi iyo hannaanka diiwaan gelinta dadka oo aad u yat.

2. Immisa ayaa lagu qiyaasay tirada dadka Soomaaliyeed muddadii u dhaxeysay 7-20 Febraayo sannadkii 1975CD?

✓ Waxaa lagu qiyaasay **5 malyan** sida uu qabo tiro koobkaasi ee sannadkaas dhacay.

3. Immisa ayaa lagu qiyaasaa tirada dadka Soomaaliyeed xilligaan hadda aan joogno?

✓ Xilligaan hadda aan joogno waxaa lagu qiyaasaa **12 malyal.**

4. Immisa qeybood ayay u qeybsantaa filiqsanaanta dadka inta badan?

✓ Waxay u qeybsantaa labo qeybood waxayna kala yihiin:-

- Hannaanka isku dheellitiran
- Iyo Hannaanka aan isku dheellitirnayn.

5. Maxaa lagu tiriyaa Cufnaanta guud ee dhulka Soomaaliya?

- ✓ Cufnaanta guud ee dhulka Soomaaliya mid aad u hooseysa waxaana lagu qiyaasaa in ay 5 qof ku nooshahay halkii km^2, marka la barbar dhigo dalalka kale iyadoo la raacayo hannaanka cabbiraadda cufka ee calaamiga ah.

6. Maxaa saameyn ku leh filiqsanaanta dadka Soomaaliyeed?

- ✓ Filiqsanaanta dadka Soomaaliyeed waxaa saameyn ku leh deegaanka dabiiciga ah ee Juqraafi ahaaneed iyo hannaanka dhaqaale ee ka jira dalka.

7. Immisa boqolkiiba dad ayaa ku nool Koonfurta Soomaaliya marka loo eego tirada guud ee dadka?

- ✓ Dad ku nool Koonfurta Soomaaliya marka loo eego tirada guud ee dadka waa 70%.

8. Maxaa loola jeeda Qaab dhismeedka da'da dadka ama bulshada?

- ✓ Qaab dhismeedka da'da dadka ama bulshada waxaa loola jeedaa da'ahaan sida ay u kala duwan yihiin bulshada, iyadoo la adeegsanayo celcelisyada.

9. Immisa ayaa lagu qiyaasaa boqolkiiba dadka da'dooda ka sareeso 60 sano ee dalka Soomaaliya?

- ✓ Waxaa lagu qiyaasaa **4%**

10. Immisa ayaa lagu qiyaasaa boqolkiiba dadka bulshada Soomaaliyeed ee aan waxba soo saarin?

- ✓ Waxaa lagu qiyaasaa **48%.**

11. Immisa ayaa lgau qiyaasaa boqolkiiba dadka xoogsada ee bulshada Soomaaliyeed?

- ✓ Waxaa lagu qiyaasaa **52%**

12. Waa maxay Qaab dhismeedka dhaqaale ee bulshada?

- ✓ Qaab dhismeedka dhaqaale ee bulshada waa filiqsanaanta dadka iyadoo loo eegayo xaaladdooda shaqo, filiqsanaanta iyadoo loo eegayo mehradahooda iyo ilaha dhaqaale ee dalka.

13. Halkee ayay ka muuqan kartaa muhiimmada Qaab dhismeedka dhaqaale ee bulshada Soomaaliyeed?

✓ Waxay ka muuqan kartaa dhanka horumarka iyo dib u dhaca.

14. Waa maxay waaxyaha shaqooyinka dadka Soomaaliyeed taa oo la diyaariayay waa hore iyadoo loo eegayo mehradooda oo ay u dheer tahay daraasad la xiriirta xoogsatada?

✓ Waaxyaha shaqooyinka dadka Soomaaliyeed:-

- Xoolo dhaqato **65%**
- Beeraley **14%**
- Xirfadleyaasha **8%**
- Kalluumeysato **1%**
- Iyo dadka adeegyada ka shaqeeya **12%.**

15. Maxaa loola jeedaa Qaab dhisameedka deegaanka bulshada?

✓ Qaab dhisameedka deegaanka bulshada waxaa loola jeedaa filiqsanaanta dadka iyadoo loo eegayo deegaanka ay ku nool yihiin kaa oo isugu jira reer guuraa, reer miyi iyo reer mgaal.

16. Immisa ayaa lagu qiyaasaa dadka Soomaaliyeed ee deggan Magaalooyinka?

✓ Waxaa lagu qiyaasaa **20%**

Casharka 5aad: Ilaha Dhaqaale ee Soomaaliya

1. Waa maxay ilaha dhaqaale ee dalka Soomaaliyeed?

✓ Ilaha dhaqaale ee dalka Soomaaliyeed waa:-

- Xoolaha
- Beeraha
- Kalluunka
- Iyo macdanta

2. Immisa boqolkiiba ayaa ka xoogsadaan xoolo dhaqashada bulshada Soomaaliyeed?

✓ Waa **70%**

3. Immisa ayuu gaarayaa bedka dhulka daaqsinka ah ee dalka Soomaaliya?

✓ Waxa uu gaarayaa ku dhawaad **28.65 malyan Hektaar.**

4. Immisa ayuu gaarayaa bedka dhulka daaqsinka ah ee Soomaaliya marka uu ballaarto sannadaha oo uu roobka badan yahay?

✓ Waxa uu gaarayaa **36 malyan oo Hektaar**

5. Waa immisa boqolkiiba bedka dhulka daaqsinka ah ee dalka Soomaaliya marka loo eego bedka guud ee dalka?

✓ Waa **57%**

6. Waa immisa boqolkiiba wax dhoofinta guud ee Soomaaliya ee dhanka xoolaha?

✓ Waa **80%**

7. Waa maxay ahmiyadda dhaqaale ee xoolaha dalka Soomaaliya?

✓ Ahmiyadda dhaqaale ee xoolaha dalka Soomaaliya:-

- Kaalintooda xagga dibbadda: waxaa lagu tiriyaa xoolaha inay yihiin waxyaabaha ugu muhiimsan ee soo saaraan dadka Soomaaliyeed oo ay dhoofiyaan, waxay la gaar tahay kaligeed ku dhawaad 805 wax dhoofinta guud ee Soomaaliya gaar ahaan sanadaha qaar.
- Xoogsiga (shaqada): waxaa ka xoogsada ku dhawaad 60% dadka Soomaaliyeed.
- Saami ahaan waxay ka tahay wax soo saarka maxilliga ah ee dalka 50%, ama waxa loo yaqaan wax soo saarka guud ee qaranka.
- Waxaa sareeya waxa ku soo aadayo qofkiiba oo xoolo ah marka loo qeybiyo dadka Soomaaliya taa aad ugu sarreysa dalalka kale.

8. Waa maxay caqabadaha dabiiciga ah ee heysta kheyraadka xoolaha?

✓ Caqabadaha dabiiciga ah ee heysta kheyraadka xoolaha:

- Saameynta cimilada isbeddelka badan sababtoo ah xaaladda wax soo saarka xooluhu waxay ku tiirsan tahay si dhameystiran daaqsinka dabiiciga ah iyo biyaha taa oo ay wax saameyn ah ku lahayn Aadanaha.
- Abaaraha iyo biyo yarida.
- Xanuunnada xoolaha iyo daryeel yarida xagga caafimaadka.
- Daaqsinka xad dhaafka ah kaa oo khatar ku ah dhulka daaqsinka isla markaana keeni kara in uu dabar go'o daaqsinka, sidoo kale waxaa lagu tilmaamaa inuu yahay sababaha ugu muhiimsan ee keena in dhulka uu iskau beddelo lama degaan taa oo ah musiibooyinka dabiiciga kuwooda ugu waaweyn ee soo food saaray Soomaaliya.

9. Waa maxay caqabadaha Aadanaha la xiriira ee heysta kheyraadka xoolaha?

✓ Caqabadaha Aadanaha la xiriira ee heysta kheyraadka xoolaha:

- Qaabka waxsoosaarka oo hooseeya:
- Aqoon yarida la xiriirta hababka xoolo dhaqashada casriga ah.
- Adeegyada asaasiga ah oo hooseeya, gaar ahaan gaadiidka loo adeegsado meelaha inta u dhexeysa goobaha xoolo lagu dhaqdo iyo sayladaha maxalliga ah.
- Calaf isku dheelitirnaanta oo aad u yar.

10. Sidee looga gudbi karaa caqabaddaha heysto waaxda xoolo dhaqashada iyo side loo hormarin karaa?

✓ Waxaa looga gudbi karaa sidaan soo socota:-

- In laga guuro xoolo dhaqasho dhaqameedka taa beddelkeedana loo guuro xoolo dhaqashada casriga ah.
- In la hormariyo adeegyada asaasiga ah ee la xiriirta waaxda xoolo dhaqashada.
- In la fidiyo calafka xoolaha qeybihiisa qallalan iyo kuwa cagaaran.
- Horumarinta seyladaha xoolaha ee maxalliga ah iyo kuwa dibadda.

- In la sameeyo xarumo lagu keydiyo warbixinnada la xiriira tiro koobyada dhammeystiran ee waaxda xoolaha, maxaa yeelay warbxixnnada iyo tirakoobka yar waxay caqabad ku yihiin dadaallada looga golleeyahay horumarinta.

11. Immisa ayaa loo qeybiyaa dalka marka loo eego beeraha?

✓ Waxaa loo qeybin karaa 3 qeybood oo kala ah:-

- Dhul ku habboon daaqsinka oo gaarayo 45.1% wadarta guud bedka dalka, waxayna noqoneysaa 8.285 malyan hektaar.
- Dhul ku habboon qodoshada beeraha waxayna ku meteleysaa 12.9% bedka guud, waxyana 2 malyan oo fadaan taa hektaar ahaan noqoneyssa 2.7 malyan hektar.
- Meelo kale oo gaarayo 42% bedka guud, waxayna noqoneysaa hektar ahaan 13.8% malyan hektar.

12. Immisa ayuu gaarayaa bedka dhulka la beerto ama laga faa'iideysto xilligaan ee dalka Soomaaliya?

✓ Bedka dhulka la beerto ama laga faa'iideysto xilligaan ee dalka Soomaaliya Kama badna 1 malyan oo fadaan oo u dhiganta 1% bedka guud ee dalka.

13. Waa maxay qaabka loo beerto bedka ku habboon beeraha oo ah 8.5%?

✓ Waxaa loo beertaa qaabka soo socda:-

- 60 kun oo fadaan waxaa loo beertaa habka waraabinta dabiiciga ah.
- 60 kun oo fadaan waxaa loo beertaa qaab waraab sanaaci ah, iyadoo la sameynayo biyo xireenno ama in heerka biyaha kor loo soo qaado.
- 880 kun oo fadaan waxaa loo beertaa qaabka roobabka.

14. Waa maxay ahmiyadda dhaqaale ee beero qodoshada?

✓ Waxtarka waaxda beeraha waxaa ka mid ah ahmiyaddeeda xagga cunnada

- Iyo ka qeyb qaadashada horumarka dhaqaale ee dalka.

15. Immisa ayay ka tahay boqolkiiba waaxda xoolo qodoshada waxsoorka maxalliga ee guud saami ahaan ee dalka Soomaaliya?

✓ Waa **10%**

16. Xagga baahi daboolidda immisa ay noqoneysa boqolkiiba waaxda beero qodoshada?

✓ Wa **15%**

17. Maxaa ka mid ahaa iskaashatooyinkii iyo wakaaladihii ay sameeyeen xukumadahii soo maray dalka si loo horumariyo shaqada waxsoorka beeraha?

✓ Waxaa ka mid ah:-

- Uruka horumarinta beeraha.
- Golaha horumarinta muuska qaranka.
- Haya'adda la dagaallanka ayaxa lama degaannada.
- Wakaaladda agabka beeraha.
- Maamulka mashaariicda guud kaa oo ay maalgelineysay Soomaaliya, iyadoo kaashanaysa dalal ajnabi ah.

18. Maxay isugu jiraan dalagyada beeraha ee dalka Soomaaliya?

✓ Waxay isugu jiraa:-

- Firileyda
- Qudaarta iyo miraha
- Dalagyada laga ganacsado.

19. Maxaa ka mid ah dalagyada laga ganacsado ee ugu muhiimsan oo lagu beero dalka Soomaaliya?

✓ Waxaa ka mid ah:-

- Cudbiga
- Iyo muuska

20. Waa maxay caqabadaha dabiiciga ah ee heysto waaxda beero qodoshada?

✓ Caqabadaha dabiiciga ah ee heysto waaxda beero qodoshada waxaa ka mid:-

- Xagga biyaha: beeraha roob waraabka ah waxaa dhibaato ku haya roobka oo aan nidaamsaneyn. Beeraha gacan waraabkana waxaa dhibaato ku ah daadadka soo fatahaya kaa oo baabi'inaya dhul beereedka.
- Dhibaatada millixda carrada: waxay noqotay dhibaatada milixda carrada waxyaabaha ugu muhiimsan ee halista ku ah wax soo saarka dhirta iyo dalagyada.
- Dhibaatada xarfashada carrada.
- Dhibaatooyinka xagga daabulidda dalagyada
- Dhibaatooyinka xagga keydinta dalagyada.

21. Maxaa ka mid ah caqabadaha Aadanaha la xiriira ee hesyta beeraha?

✓ Caqabadaha Aadanaha la xiriira ee hesyta beeraha:-

- Hababka waxsoosaarka oo liita.
- Shaqaalo yarida guud ahaan kuwa xirfadda leh.
- Faragelinta ka imaaneysa ururrada iyo hay'adaha caalamiga ah iyagoo ku marmarsiyoonayo kaalmo bani'aadam balse ujeedku yahay in hoos loo dhigo lana baabi'iyo dhaqaalaha guud gaar ahaan beeraha.

22. Waa maxay shanta tiir oo waa weyn ee leeyihiin warshadaha?

✓ Shanta tiir oo waa weyn ee leeyihiin warshadaha waa :-

- Helitaanka maaddada Caydhiinka ah
- Shaqaale xirfadleyaal ah
- Ilo tamar
- Isgaarsiin (gaadiid)
- Ra'samaal
- Suuq loo iib geeyo.

23. Maxaa ka mid ahaa warshada uu dalka lahaa?

✓ Warshada uu dalka lahaa waxaa ka mid ahaa:-

- Warshadaha cunnooyinka
- Warshadaha sonkorta, qasacadeynta hilibka iyo kalluunka.

24. Immisa boqolkiiba ayaa ka xoogsan jirtay Warshadaha cunnooyinka?

✓ Waxaa ka xoogsan jiray **30%**

25. Immisa ayaa lagu qiyaasaa shaqaalaha dalka ee ka shaqeeya kalluunmeysiga?

✓ Waxaa lagu qiyaasaa **96,000 oo qof.**

26. Immisa boqolkiiba ayaa lagu qiyaasaa saamiga waxa la kalluunmeysto ee wax soo saarka guud ee qaranka?

✓ Waa **2%**

27. Immisa ayaa lagu qiyaasaa boqolkiiba dadka ka xoogsado mehradda kalluumeysiga?

✓ Waa **3%**

28. Immisa ayay gaaraysaa qiimaha lacageed ee kalluumeysiga laga soo saaro?

✓ Waxa uu gaarayaa **8.6 malyan** oo doolarka Mareykanka.

29. Immisa nooc ayay gaarayaan noocyada kalluunka ee laga kalluumeysto Soomaaliya?

✓ Waxa ay gaarayaan **17 nooc.**

30. Maxaa ka mid ah noocyada kalluun ee laga kalluumeysto Soomaaliya?

✓ Waxaa ka mid ah:-

- Abu Shanab
- Durak
- Shaar
- Faris
- Tuna
- Byad

- Shadiya
- Iyo Carabi.

31. Maxaa ka mid ah caqabadaha heysta ka faa'iideysiga kalluunka Soomaaliya?

✓ Caqabadaha heysta ka faa'iideysiga kalluunka Soomaaliya waxaa ka mid ah:-

- Dhaqamada laga dhaxlay awooweyaasha ee kallun cunidda gaarsiiyay ilaa xad inuu xaaran yahay oo kale, gaar ahaan dadka reer miyiga ah iyo in la takooro dadka ka xoogsado xirfadda kalluunmeysiga ee ka mid ah bulshada Soomaaliyeed.
- Hilibka xoolaha oo aad u badan iyo baahida loo qobo hilibka kalluunka oo aad u yar.
- Dhulka oo caro san ah kuwa wanagsan beerashada.
- Sidoo kale waxaa inta dheer labo caqabadood oo aad u waaweyn ee heysta dhammaan waaxyada dhaqaale ee dalka Soomaaliya waxayna kala yihiin:-

a. Ra'samaalka qaranka oo aad u yar kaa oo saameyn ku yeeshay dhammaan dhinacyada nolosha Soomaaliyeed. Ra'samaalka waa qodob lagama maarmaan u ah in ay guuleysato howl kasta oo ka mid ah waxsoosaarka xagga badda sida agabka, hababka warshadeynta, suuq geynta iyo nidaaminta.

b. Shaqaalaha ama xoogsatada kalluunmeysatada xirfadleyda ah oo aad u yar si guud iyo qaxa dibada oo badan.

32. Sheeg saddexda astaameed ee uu leeyahy Ganacsiga dibadda ee Soomaaliya?

✓ Saddexda astaameed ee uu leeyahy Ganacsiga dibadda ee Soomaaliya waa:-

- Ku tiirsanaanta alaabta caydhiinka
- Qaab dhisameedka oo yar iyo filiqsanaanta Juqraafi oo ciriiri ah.
- Isbeddella aadka u badan.

33. Waa maxay labada dhinca ee ganacsiga Soomaaliya ee xagga wax dhoofunta dibadda ku tiirsan tahay?

✓ Labada dhinca ee ganacsiga Soomaaliya ee xagga wax dhoofunta dibadda ku tiirsan tahay waa:-

- Qaab dhisameedka badeecadda
- Iyo filiqsanaanta juqraafiyeed.

34. Waa maxay labada nooc ee loo qeybin karo waddooyinka xagga dhulka Soomaaliya?

✓ Labada nooc ee loo qeybin karo waddooyinka xagga dhulka Soomaaliya:-

- Waddooyinka la habeeyay (laami).
- Waddooyin aan habeysneyn.

35. Waa maxay waddooyinka la habeeyay?

✓ Waddooyinka la habeeyay waa waddooyin laami ah oo leh celcelis ahaan ballaclaba mitir ah, qeybta koonfureed ee dalkana ay la gaar tahay 75% waddooyinkan laamiga ah.

36. Waa maxay waddooyinka aan habeysneyn?

✓ Waddooyin aan habeysneyn waa waddooyin cidhiidhi ah, oo qaarkood ku daboolan yihiin qururux, halka kuwa kalena ay yihiin dhul bataax ah.

37. Immisa dekadood oo waa weyn ayay leedahay Soomaaliya?

✓ Waxay leedahay Shan furdo (dekad) oo waaweyn.

38. Goormee ayaa la aasaasay hay'adda maamulka dekadaha Soomaaliya?

✓ Waxaa la aasaasay sannadkii **1962 CD.**

39. Immisa markab ayay Soomaaliya lahaan jirtay?

✓ Waxay lahaan jirtay Shan Markab.

40. Goormaa ayaa la waayay maraakiibtii ay lahaan jirtay Soomaaliya?

✓ Waxaa la waayay intii ay socdeen dagaalladii sokeeye ee dalka ka dhacay.

41. Immisa ayaa lagu qiyaasaa isugeynta dhererka waddooyinka dhulka?

✓ Waxaa lagu qiyaasaa sida ku xusan xogta 1999 ilaa **22100km.**

42. Immisa ayay gaarayaan dherer ahaan waddooyinka habeysan?

✓ Waxa ay gaaraysaa **2600km**

43. Immisa ayay gaarayaan dherer ahaan waddooyinka aan habbeysneen?

✓ Waxa ay gaarayaan **9500km.**

44. Maxaa ka mid ah faa'iidooyinka gaadiidka duulista hawada?

✓ Faa'iidooyinka gaadiidka duulista hawada waxaa ka mid ah:-

- In ay awood u leedahay gaaritaanka meelaha aysan gaari Karin sababtoo ah wuxuu awood u leeyahay in uu ka gudbo caqabado badan oo dabiici ah sida lama degaannada aadka u ballaaran, taxana buureedka aadka u dhaadheer, kaymaha aadka u cufan, dhulka dhasheegga ah, ilo biyoodyada sida badaha iyo badweynta.
- Gaadiidkaan wuxuu si gaar ah daabulaa dad weynaha iyo badeecooyinka fudud islamarkaana qiimahoodu oo sarreeyo.

45. Maxaa matalayo gaadiidka hawada sare sida aasaasiga ah?

✓ Waxaa matalaya:-

- Diyaaradaha iyo
- Gegida diyaaradaha.

46. Goormee ayaa la aasaassay shirkadda diyaaradaha Soomaaliya?

✓ Waxaa la aasaasay **15/7/1963 CD**. ***Saanna la mid waayay 7/15/1963 CD***

47. Immisa gegi ayay leedahay Soomaaliya? Maxayna kala yihiin?

✓ Waxa ay leedahay Afar gegi diyaaradeed oo caalami ah oo kala ah:-

- Gegida Muqdisho, Hargeysa, Kismaayo iyo Berbera.

48. Maxaa ka mid ah goobaha kala duwan ee dalxiis ee dalka Soomaaliya?

✓ Waxaa ka mid ah:-

- Dalxiis madadaalo.
- Xeebaha
- Il biyoodyada dabiiciga ah

- Meelaha joogga sare leh.

49. Maxaa ka mid Dalxiiska meelaha qadiimiga ah ee dalka Soomaaliya?

✓ Waxaa ka mid ah:-

- Booqashada masaajidda qadiimiga ah, ee la dhisay taariikhda bilowgii Islaamka.
- Booqashada magaalooyinka taariikhiga ah.
- Xabaalooyinkii hore kuwaa oo maxalli ahaan loo yaqaano magaca xabaalooyinka Tire oo loola jeedo xabaalooyinkii dadka awoodda badan, xabaalahaan waxay kasoo jeedaan casriyadii hore.